Ka soo qaad in dhererka salaanku Joogga darbiga u ka gaadhay tahay h . Ka soo qaad in sallaanku ujiro darbiga x halbeeg. Ka dhig θ inay tahay xagasha sallaanka iyo dhulku sameeyaan.

Kolkaa, $x^2 + h^2 = 9^2$

$$4. \quad \tan \theta = \frac{h}{x}$$

$$0.35 = \frac{h}{x}$$

$$x = \frac{h}{0.35} = \frac{20h}{7}$$

Haddaba, $x^2 + h^2 = 81$

$$\left(\frac{20h}{7}\right)^2 + h^2 = 81$$

$$\frac{400h^2}{49} + h^2 = 81$$

$$400h^2 + 49h^2 = 49 \times 81$$

$$h^2 = \frac{49 \times 81}{449} \Rightarrow h = \frac{63}{\sqrt{449}}$$

7.2.2 Qiimeyaasha saynka, kosaynka iyo Taanjantka xaglaho 45° , 30° iyo 60°

Waxa ardayda laga filiyaa inay ku keenaanshaqada hawlgalka 7.4. qiimeyaasha. Tani waxaa lagu dhiirigalin karaa arday kastaa inuu baadhis kaga helo saamiyada tirignoomateriga hawlgalka inta lagu jiro. Waa inaad ku daysaa ardaydu inay gunaanadaan saynka, kosaynka iyo tanjantka $\angle A$ iyo $\angle B$.

Dhamaadka hawlgalka 7.4 ka dib, waydii ardayda qaarka midah inay sheegaan qiimayaasha saamiyada tirignoomateri ee ay soo saareen.

Waxa suuragal ah in ardayda qaarkood ay adeegsadeen aragtiinka Baytograf, qaar koodna ay shakaalka ku cabbireen mastarad.

Ardaydu waxay u baahan yihiin inay ka wada hadlaam faraqyadani islamarkaa ay ku gaadhaan ama go'aamiyaan saamiyad tirignoomateri hufan.

Falanqaynta fasal ama shaqo kooxeed waa in uu u dhacaa hubantida ah in badanka saamiyada lagu helay baadhista ay isku mid yihiin.

Hawlgal 7.5

Hawsha hore waa hubaasha in ardaydu ay sawireen saddexagal labaale ah oo addimadu ay yihiin 10cm iyo in kale.

1. Ardaydu waxay soo saari dhererka shakaalka iyagoo istic-maalaya aragtiinka Baytogoras. Waxaad tani u isticmaali kartaa mudnaan. Waa inay ugu horaanta cabbiraan oo ay helaan ugu dhawaanta saamiyada trignomateri ee.
2. $m(\angle A) = 45^\circ$ iyo $m(\angle B) = 45^\circ$
3. $\sin A = \cos A = 0.5$
 $\tan A = 1$
4. Waydii ardayda saamiyada trignoomatriga xaglaha 45° . Ugu dambeyn tus saamiyada trignomateriga xagasha 45° oo hubi. Haddana la falanqee tusaalooyin ka fasalku ama koox ay ka shaqeeyeen.

Jawaabta Hawlgalka 7.5

Saynka, koysaynka iyo taanjantka 30° iyo 60° xaglo ah. Ardayda waxa laga filayaa inay isticmaalaan habka lagu tusay Xagasha 45° Hawsha hore waa in la awoodsiyo ardayda si ay u sawiraan saddexagal leh 30° iyo 60° xaglo ah. Tani waxaynun siisaa fursadda inay sawiraan ama dhisaan saddexagalka qumanee leh xaglaha fiiqan ee 30° iyo 60° .

Jawaabta Hawlgalka 7.6

1. Waa inaad hubisaa in ardaydu ay haystaan qalabyada loo baahan yahay. Sida u tilmaamey buugga ardaygu ujeedada hawlgalku waa in lasoo saaro saamiyada trignomateriga xaglaha ah 30° iyo 60° .
Xaglaha 30° iyo 60° waxa sameeya saddexagal siman iyo joogga. Sababtani awgeed waa inay ardaydu awoodaan dhisitaanka saddexagal siman.
Cabbirka dhinac kasta waa 4cm maadaama dhinac kastaa yahay gacan. Haddaba nooca saddexagalku waa saddexagal siman. Kolkaa cabbirka xagal kastaa waa 60°
2. Dhererka joogga waxa lagu cabbiran karaa ugu dhawaanta dhowr god. Ardayda qaarkood waxay ku soo saari cabbiridda hufan tii oo la isticmaalayo aragtiin ka Baytogradas sida soo socota:
 - b. $CD^2 + BD^2 = AC^2$
 $CD^2 + 2^2 = 4^2$
 $CD^2 = 12$
 $CD = 2\sqrt{3}$
 - t. cabbirka xagasha $\angle ACD$ waa 30° .

$$\begin{aligned} \sin A &= \frac{CD}{AC} & \cos A &= \frac{AD}{AC} & \tan A &= \frac{CD}{AD} \\ &= \frac{2\sqrt{3}}{4} & &= \frac{2}{4} & &= \frac{2\sqrt{3}}{2} \\ &= \frac{\sqrt{2}}{3} & &= \frac{1}{2} & &= \sqrt{3} \end{aligned}$$

j. $\sin(m(\angle ACD)) = \frac{AD}{AC}$ $\cos(m(\angle ACD)) = \frac{CD}{AC}$, $\tan(m(\angle ACD)) = \frac{AD}{CD}$

$$\begin{aligned} &= \frac{2}{4} & &= \frac{2\sqrt{3}}{4} & &= \frac{2}{2\sqrt{3}} = \frac{1}{\sqrt{3}} \\ &= \frac{1}{2} & &= \frac{\sqrt{3}}{2} & &= \frac{\sqrt{3}}{3} \end{aligned}$$

3. Waxa cad in $\angle A \equiv \angle B$ islamarkaa $\angle BCD \equiv \angle ACD$, sida $\angle A$ iyo $\angle B$ ay ku yeesheen qiimo trignomateri isku mid ah. Iyana $\angle BCD$ iyo $\angle ACD$ waxay leeyihiin fansaaro trignomateri isku mid ah. Waxaa dheeri ah, waxaad si toos ah ugu hagi kartaa ardaydu inay soo saaraan saynka, kosaynka iyo taanjantka xaglaha 30° iyo 60° .

Jawaabaha laylis 7.4

1. b. Markaa $45^\circ = \frac{5m}{\ell}$

t. Haddii dhererka hadhku yahay ℓ markaa taan $30^\circ = \frac{5m}{\ell}$

$$\frac{1}{\sqrt{3}} = \frac{5m}{\ell} \quad \ell = 5\sqrt{3}m$$

j. Ka soo qaad dhererka sallaanku inuu yahay kolkaa sayn $45^\circ = \frac{12m}{\ell}$

$$= \frac{\sqrt{2}}{2} = \frac{12m}{\ell}$$

$$\ell = \frac{24}{\sqrt{2}}m$$

$$= 12\sqrt{2}m \approx 16.9706m$$

x. $m(\angle A) = 60^\circ$. Ka dhig balladhka wabiga w . Kolkaa $\tan 60^\circ = \frac{10m}{w}$

$$\sqrt{3} = \frac{10m}{w}$$

$$w = \frac{10m}{\sqrt{3}}$$

$$w = \frac{10\sqrt{3}}{3}$$

$$w = 5.7735$$

Kh. Ka soo qaad balladhka hartu in uu yahay w kolkaa taan $30^\circ = \frac{w}{7km}$

$$\frac{\sqrt{3}}{3} = \frac{w}{7km} \quad w = \frac{7\sqrt{3}}{3} km.$$

2. Dhinacyada la amaara deeyey waxaalagu soo saari karaa xaqqiyooyinka kale ee aan aheyn saamiyada tirignometariga. Tusaale ahaan su, aasha b, $x = 1$ waayo saddex-xagalka waa labaale oo $y = \sqrt{2}$ tioola isticmaalayo aragtiinka baytagras, laakiin hawsha ugu muhiimsan masalooyinka waa kushaqeynta saamiyada tirignomateriga, haddaba ku hogaami ardayda si ay u habeeyaan saamiyada tirignometariga.

b. Sayn $45^\circ = \frac{1}{y}$ taan $45^\circ = \frac{1}{x}$

$$= \frac{1}{\sqrt{2}} = \frac{1}{y} \quad 1 = \frac{1}{x}$$

t. Sayn $45^\circ = \frac{x}{3}$ kosayn $= \frac{y}{3}$

$$\frac{\sqrt{2}}{3} = \frac{x}{3} \quad \frac{\sqrt{2}}{2} = \frac{y}{3}$$

$$x = \frac{3\sqrt{2}}{2} \quad y = \frac{3\sqrt{2}}{2}$$

3. Way caddahay in $m(\angle BAD) = 2\theta$
Haddaba, $2\theta + \theta = 90^\circ$
 $3\theta = 90^\circ$
 $\theta = 30^\circ$

Adeegsashada $\triangle ABC$, $\tan 30^\circ = \frac{4}{x}$

$$\frac{1}{\sqrt{3}} = \frac{4}{x}$$

$$x = 4\sqrt{3}$$

Adeegsashada $\triangle ABD$, $\tan 60^\circ = \frac{BD}{AB}$


$$\sqrt{3} = \frac{BD}{4\sqrt{3}}$$

$$BD = 4\sqrt{3} \times \sqrt{3} = 4 \times 3 = 12$$

Tani waxay ina siinaysaa $y = 12 - 4 = 8\text{cm}$

Ma tusi kartaa in $AC = DC$?

4 Fiiri Jaantuska 7




Faraqa u dhexeeya joogagga barta A iyo barta C waa 100m.

$$\sin 30^\circ = \frac{BC}{AC}$$

$$\frac{1}{2} = \frac{100m}{AC}$$

$$AC = 200m$$

5. Ka dhig xagasha u salaanku la sameeyo dhulka ay tahay A.




$$\sin A = \frac{6}{12} = \frac{1}{2}$$

$$\text{Sidaa } m(\angle A) = 30^\circ$$

Fiiri jaanka 7

6.



$$\sin A = \frac{15}{173} \approx 0.8671$$

$$\angle A \approx 60^\circ$$

7.3 SHAXAMADA ADKE

Xisooyinka qoondaha: 6 xiso

Waxa ardayga laga rabaa

Dhamaadka cutub-hoosaadkan kolka uu ardaydu waxay awood u yeelan doonaan in ay:

- *Gartaan qaybaha Bayraamidh*
- *Diyaariyaan bayraamidhyo moodeelo ah*
- *Magacaabaan bayraamidhyada noocyo kala duwan iyadoo ku saleynaya salka ay leeyihiin*
- *Gartaan qaybaha toobin*
- *Diyaariyaan toobino moodeel ah.*

Erayo

- Shaxamada adke, Bayraamidh, Toobin, sal, joog, gees, geeska dadabta, wajiga dadabta, waji,

Hordhac

Cinwaankan wuxu ku lug leeyahay sawiridda iyo ka diyaarinta waraaqo ama walaxo balaastik ah muunadaha shaxannada adke ee bayraamidhyo iyo toobinno.

Ardaydu waxay aqoon u leeyihiin shaxannada adke sida biriisamyo iyo dhululubooyin. Waxa kale oo iyana ay yaqaanaan walxaha qaar leh muuqa bayraamidh ama toobin. Mawduucan waxa lagaa filayaa inaad barto qaybaha iyo magacyada bayraamidh quman iyo toobin goobeed quman. Mugga iyo bed-duleedku kuma jiro.

Hawlgalada iyo shaqo-kooxeedyada waxa loo qorsheeyey si loo baro adkeyaashan. Waxa raacsan, tusaalooyin adduunka xaqiiqa ku ah kuwan ku habboon kuna filan.

Jawaabaha shaqo-kooxeedka 7.4

Ardaydu waxay yaqaanaan masalaha ama saliyada fidsan. Howshaadu waa inaad dhex marto oo aad fiiriso inay jiraan arday aan dhisi Karayn Muunadaha. Ugu dambeyn bayramidhyo si fiican u habaysan qaar ah u door oo tus fasalka.

1. Nooc adke bayraamidh ah.
2. Ardayda ku xiisogeli inay xariiqaha dhibic-dhibicda ah ugu isticmaalaan xariijimaha dhinacyada dambe sida ka lagu siiyey hawlgalka xiga.

Jawaaba hawlgal 7.7

1. Tani waxa lagaga jawaabi karaa afka l,





b. 4	t. 5	j. 6
------	------	------

2. b. Bayraamidhka qaabka saddexagal leh waji kasta ayaa noqon kara sal.
t. Afordhinaclaha BEFG ayaa ah salka
j. Shan dhinaclaha ABCDE waa salka.
3. Geesaha V, P iyo T waa baraha aan ahayn salaxa salka
4. Ka codso ardayda qaarkood inay sharaxaan bayraamidh, oo dhamaadkana si habsan adigu ugu sharax.

7.3.2 Toobinno

Jawaabta shaqo-kooxeed 7.5


1. Ka caawi ardayda si ay u maleeyaannooca adkaha samaysma kolka salka bayraamidhku yahay bed goodbeed. Waxa suuragal ah in ardayda qaar ay baraamidh laga shaqaynayo bedalaan iyagoo gees dadab toosan ama wajiyada dadaba ay waji xoodan ka dhigaan. Natiijada adkaha soo baxay waa toobin.
2. Ku dhiirigali ardayda si ay u sawiraan goobooyin oo ayna uga gooyaan si taxadirleh goob –gobolka.



3. U sheeg ardaydu inay koor giraangiriyaan goob-gabala oo ay cabbiraan gacamada.
4. U xul ardayda qaar ah si ay muunadaha u tusaan fasalka.
5. Fursad u sii ardaydu si moodeelada ugu sharaxaan ereyadood. Ka dib sii qeexda toobin

Laylis 7.5

1. Ku dhiirigali ardayda inay sawiraan toobin la ogyahay. Ka codso ardayda qaarkood inay toobinka u muujiyaan fasalka.
2. b. t.



3. 4 kolka salku yahay bed saddexagal ah
4. Wajiyada dadban ee bayraamidh qaabsan waa saddexaglo labaaaleyaal ah.

Jawaabaha layliska guud

1. Adeegso Aragtiinka Baytogradas si looga jaawaabo su'aasha 1
- b. $C^2 = 1^2 + 2^2$
 $= 5$
 $C = \sqrt{5}$
- J. $x^2 + (2\sqrt{3})^2 = (3\sqrt{3})^2$
 $x^2 + 4 \times 3 = 9 \times 3$
 $x^2 + 12 = 27$
 $x^2 = 15$
 $x = \sqrt{15}$
- Kh. $C^2 = (\sqrt{3})^2 + (5)^2$
 $= 28$
 $C = \sqrt{28}$
 $C = 2\sqrt{7}$
- t. $a^2 + 12^2 = 37^2$
 $a^2 = 37^2 - 12^2 = 1369 - 144 = 1225$
 $A = 35$
- x. $1^2 + p^2 = (1.25)^2$
 $1 + p^2 = 1.5625$
 $p^2 = 0.5625$
 $p = 0.75$
- d. afardhinacluhu waa qardhaas xaglagooyeyaasha qardhaastu way isku qotomaan.
Haddaba $x^2 = 4^2 + 3^2$
 $= 25$
 $x = 5$

$$r. \quad \tan 45^\circ = \frac{a}{4} t$$

$$1 = \frac{a}{4}$$

$$a = 4$$

$$\sin 45^\circ = \frac{a}{c}$$

$$\frac{\sqrt{2}}{2} = \frac{4}{c}$$

$$c = 4 \times \frac{2}{\sqrt{2}}$$

$$C = \frac{8}{\sqrt{2}} \text{ ama } 4\sqrt{2}$$

$$s. \quad \sin 30^\circ = \frac{a}{10}$$

$$\frac{1}{2} = \frac{a}{10}$$

$$\cos 30^\circ = \frac{b}{10}$$

$$\frac{\sqrt{3}}{2} = \frac{b}{10}$$

$$b = 5\sqrt{3}$$

$$1. \quad i. \quad \tan 60^\circ = \frac{a}{1}$$

$$\sqrt{3} = a$$

$$a = \sqrt{3}$$

$$\cos 60^\circ = \frac{1}{c}$$

$$\frac{1}{2} = \frac{1}{c}$$

$$c = 2$$

2. kaga jawaab su'aalaha b iyo t adoo adeegsanaya Aragtiin ka yukliidh

$$b. \quad x^2 = 1 \times (1+3)$$

$$= 4$$

$$x = 2$$

$$t. \quad 4^2 = 10x$$

$$16 = 10x$$

$$x = 1.6$$

$$h^2 = 1 \times 3$$

$$h = \sqrt{3}$$

$$y^2 = 1.6(1.6+10)$$

$$y^2 = 18.56$$

$$y = \sqrt{1.56}$$

$$\approx 4.3081$$

$$z^2 = 10(10+1.6)$$

$$= 116$$

$$z = \sqrt{116}$$

$$= 2\sqrt{29}$$

j. su'aalaha j iyo x, kolka hore Aragtiinka Baytogras Kadibna Aragtiinka yukhiidh.

$$(x + y)^2 = 3^2 + 4^2$$

$$(x + y)^2 = 25$$

$$x + y = 5$$

u adeegs ashada Aragtiinka yukliidh

$$3^2 = x(x + y)$$

$$3^2 = x(5)$$

$$x = \frac{9}{5}$$

$$y = 5 - x = 5 - \frac{9}{5} = \frac{16}{5}$$

$$h^2 = xy = \frac{9}{5} \times \frac{16}{5}$$

$$h = \frac{3 \times 4}{5}$$

$$h = \frac{12}{5}$$

$$\text{x. } (x + y)^2 = (24)^2 + 7^2$$

$$= 625$$

$$x + y = 25$$

$$7^2 = y(x + y)$$

$$49 = 25y$$

$$y = \frac{49}{25}$$

$$x = 25 - \frac{49}{25} = \frac{576}{25}$$

$$h^2 = xy$$

$$= \frac{576}{25} \times \frac{49}{25}$$

$$h = \frac{24 \times 7}{25} = \frac{168}{25}$$

$$\text{Kh. } 4^2 = x(x + 3x)$$

$$16 = 4x^2$$

$$x = 2$$

$$3x = 6$$


$$y^2 = 3 \times (x + 3x)$$

$$y^2 = 6(2 + 6)$$

$$y^2 = 48$$

$$y = 4\sqrt{3}$$

3.



Ka dhig ABCD labajibbaarane oo dhinac kasta yahay 5cm. Ka dhig xaglagooyuhu yahay d.

$$\text{Kolkaa } d^2 = (5 \text{ cm})^2 + (5 \text{ cm})^2$$

$$= 50 \text{ cm}^2$$

$$d = 5\sqrt{2} \text{ cm}$$

4. Ka dhig dhinaca labajibbaararnaha leh xaglagooyaha 12 cm yahay x. kolkaa

$$x^2 + x^2 = (12 \text{ cm})^2$$

$$2x^2 = 144 \text{ cm}^2$$

$$x = 6\sqrt{2} \text{ cm}$$


5. Ka soo qaad xaglagooyaha laydiga leh dhinacyada 3cm iyo 7cm u yahay d. kolkaa

$$d^2 = (3 \text{ cm})^2 + (7 \text{ cm})^2$$

$$= 9 \text{ cm}^2 + 49 \text{ cm}^2$$

$$d = \sqrt{58} \text{ cm}$$

6. Kolka hore sawir salaam ku tiirsan darbi qotoma. Waxaadku diyaarin kartaa jaarti darbiga la sudho.



Ka soo qaad dhererka joogga darbiga salaamku gaadhay tahay h. Fiiri jaantuska 7.

$$h^2 + (3 \text{ m})^2 = (10 \text{ m})^2$$

$$h^2 + 9 \text{ m}^2 = 10 \text{ m}^2$$

$$h^2 = 9 \text{ m}^2$$

$$h = \sqrt{9} \text{ m} \approx 9.5394 \text{ m}$$

7. Xaglagooyeyaasha qardhaastu way isku qotomaan islamarkaa na way is qaybshaan. Fiiri jaantuska 7 ka dhig $AC = 8\text{cm}$ islamarkaa $BD = 6\text{cm}$

$$CD^2 = CE^2 + DE^2$$

$$CD^2 = \left(\frac{1}{2}AC\right)^2 + \left(\frac{1}{2}BD\right)^2$$

$$= (4\text{cm})^2 + \left(\frac{1}{2}BD\right)^2$$

$$= (4\text{cm})^2 + (3\text{cm})^2$$

$$= 16\text{cm}^2 + 9\text{cm}^2$$

$$= 25\text{cm}^2 \Rightarrow CD = 5\text{cm}$$

Wareegga ABCD waa $4DC = 20\text{cm}$

8. Ka soo qaad dhererka shakaal c , addinka ugu gaabana ka dhig kolkaa

$$c = a + 4$$

$$a^2 + 8^2 = c^2$$

$$a^2 + 64 = (a + 4)^2$$

$$a^2 + 64 = a^2 + 8a + 16$$

$$8a = 48$$

$$a = 6$$

$$c = 6 + 4 = 10$$

Wareegga saddexagalku waa $(6 + 8 + 10)\text{cm} = 24\text{cm}$


9. Ka dhig dhererka harada k , kolkaa

$$k^2 = 100^2 + 100^2$$

$$k^2 = 2 \times 100^2$$

$$k = 100\sqrt{2}$$

$$\approx 141.4214$$



Shaqada mashruuc

Ka codso ardaydu inay muujiyaan sawirka walaxda ay cabbirayaan baladhkeeda ama dhererkeeda.

Ku dhiirigali inay ku soo bandhigaan shaqada fasalka, u dooro meel deggan haddii kale agagaarka dugsiga u isticmaal.

Ku dhiirigali si ay ugu diyaariyaan jaarti su'aalaha 10 iyo 11 ayna u tusaan fasalka. Uga dooro shaqooyinka ugu fiicansi waxbarasha mustaqbalka dambe loogu isticmaalo.

14. Si loo baro dhinac salka bayramidh waxa jira waji dadab la gudboon.

b. 9 t. 20 j. n

15. y

16. Haddii salka bayraamidh laga dhigo ku goobo ah kolkaa, adkuhu wuxuu noqon toobin.

MUQARARKA XISAABTA FASALKA 8^{AAD}

**Waxaa Tarjumay
Mr. Cabdisalaad Maxed**

**Muqararka
Xisaabta fasalka 8^{aad}**

HORDHAC

Xisaabtu waa Indha-indhaynta, muujinta iyo Baadhitaanka susunta (Hab-yaallada) iyo xidhiidhaha ka dhexeeya walxaha xisaabeed iyo Aragtida.

Barashada xisaabtu waa in ay kobcisaa kartida Ardayda eek u wajaha:-

- In ay xaaladdaha Jira ka dhex Arkaan xisaabta isla markaana ay doortaan xisaabta ku habboon xaaladdahaas.
- In ay si loojig ah, hal-Abuur leh, isla markaana xeeladaysan ay uga shaqaysiiyaan maskaxdooda ama ay u Fekeraan.
- In ay Qorsheeyaan, Baadhaan isla markaana sameeyaan go'aan ka saabsan Heerarka saxnimada.
- In ay si xaqiiqo ahaan ah u sababeegaan, una Faaqidaan Tallaabooyinka suurtagalka ah (options) isla markaana ay mskaxda ku hayaan cawwaaqibka iyo Dhibaatooyinka Goban-qaadashada.

Shaxda soo socota waxay muujinaysaa Talobixinnada (Talo soo jeedinta) ku saabsan Hababka mabaadiida Baris-Barashada Firfircoon ee lagu hanan karo Barashada xisaabta heerka Fasalka 8^{aad}, iyada oo maskaxda lagu haynayo Marxaladdaha Horumarinta ardayda ee hadda Taagan ama hadda socota.

Mabaadida Barashada	Xeeladdaha ay Bareyaashu u adeegsan karaan Hirgelinta Mabaadi,daas.
<p><u>Fursaddaha wax loo baran karo</u> Khibraddaha Barashadu waa in ay Ardayda Awoodsiisaa u Fiirsashada iyo ku Celcelinta Ficil ahaaneed ee Hanaanka, xirfaddaha, Tarminta (waxa la soo saarayo) iyo Qiimaha dhabta ah ee laga rajeynayo Ardayda.</p>	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Qaabaynta (To model) Hanaanka xisaabeed iyo Furfurista ma'alooyinka (xallinta Dhibaatooyinka) ee loogu Talagalay Ardayda, u adeegso xeeladdaha kor u qaadaya ka shaqaysiinta Maskaxda (Think-Aloud “Strategies”). ▪ Sii Ardayda Fursaddo u saamaxaya in ay Qeexaan, sharraxaan ama sabsabeeyaan waxa la doonayo. ▪ Sii Ardayda Fursaddo u saamaxaya in ay xisaabta u adeegsadaan xallinta Dhibaatada, Raadinta Hab-yaallada (pattern Finding) iyo Go'aan – qaadashada ee xaaladdaha soo Foodsaara. ▪ Sii Ardayda Fursaddo u saamaxaya in ay khibrad ka helaan Hanaanka ay xisaab ahaan u shaqaynayaan. ▪ Xaqiiji in Ardayda ay haystaan Fursaddo ay ku kobcinayaan kalsoonidooda in ay xirfaddaha xisaabeed ku dabbakhaan xaaladdaha kala duwan ee degaankooda ka jira.
<p><u>Isku Xidhiida iyo</u> Khibraddaha Barashadu waa in ay noqotaa mid isku xidhaysa Aqoonta iyo xirfaddihii</p>	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Samee isku xidhid ka dhexaysa xisaabta la doonayo Ardaydu in ay bartaan iyo Aqoon toodii hore iyo xaaladda hooda

Mabaadida Barashada	Xeeladdaha ay Bareyaashu u adeegsan karaan Hirgelinta Mabaadi,daas.
<p>hore ee Ardayda iyo Aqoonta iyo Xirfaddaha cusub ee labarayo Ardayda iyada oo loo sii fidinayo hababkooda Fekeridda & Waxqabadkooda</p>	<p>shaqsiyadeed ee Ardayda.</p> <ul style="list-style-type: none"> ▪ Isku xidh xisaabta ay Ardaydu Baranayaan iyo Maaddooyinka kale ee Manhajka. ▪ Kula Halgan Ardayda in ay qabatimaan Dariiqooyinka xisaabta isla markaana ay ku dabbakhaan xaaladdaha ka jira Deegaankooda. ▪ Ka caawi in ay Fursad u helaan isgaarsiinta macluumaadka Farsamada casriga ah (ICT) si ay u cabbiraan karaankooda xisaabeed iyo xadadkeedaha.
<p><u>Falalaka iyo Kabaaraandegidda</u> Khibraddaha Barashadu waa in ay noqdaan kuwo macno buuxa sameynaya Isla markaana Ardayda ku dhiirigelinaya in ay si Ficil ah u qabtaan kana Baaraandegaan waxa la barayo.</p>	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Sii Ardayda Fursaddo u saamaxaya in ay Falanqeeyaan Xeeladdaha xisaabeed ee lagu guulaysan karo iyo kuwa aan lagu guulaysan Karin. ▪ Sii Ardayda Fursaddo u saamaxaya in ay ka Baaraandegaan isla markaana ku falanqeeyaan Horuka coda ama Guulaha ay xisaabta ka gaadheen. ▪ Samee shuruuddaha Qiimeynta xisaabta, isla markaana Abuur Fursaddo u saamaxaya Ardayda in ay Naftooda Qiimeeyaan.
<p><u>Xiisogelinta iyo Bar-Tilmaameedka</u> Khibraddaha Barashadu waa in ay noqdaan kuwo xiisogelinaya Ardayd isla markaana ay noqdaan kuwo si cad ugu hagaya Bar-Tilmaameedkooda.</p>	<ul style="list-style-type: none"> ▪ U Ifitiimi Dabbakhaaddaha Nolosha dhabta ah (sida xisaabta loogu dabbakho Nolosha dhabta ah) iyo Faa'iiddooyinka Mustaqbalka ee xisaabta ay Ardaydu hadda baranayaan. ▪ Isku xidh Barashada xisaabtu Faa'iiddooyinka ay u leedahay Nolosha Ardayda iyo bay'adda Deggaankoodaba. ▪ Iskuxidh Barashada xisaabtu Faa'iiddooyinka ay u leedahay Mustaqbalka waxbarashooda Jaamacadeed iyo shaqooyinka ay heli doonaan.
<p><u>Waxbarasho loo dhanyahay</u> Khibraddaha Barashadu waa in ay Ixtiraamtaa isla markaana ay noqotaa mid ay u dhan yihiin Dhammaan Noocyada kala duwan ee Ardayda (Farqiyada u dhexeeya Ardayda)</p>	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Naqshadee (Design) hawlgalo xisaabeed oo leh Qaabab Barasho oo ku kala duwan styles Qiimaha (values), Jenderka (Gender), kartida, xiisaha, Dhaqannada iyo taariikh – Nololeedka Qoyska. ▪ Naqshadee ama diyaari Hawlgalle xisaabeed kuwaas oo aad ku qaadanayso (ku xulaynayo) kala duwaan shaha Ardayda ee korriinkooda Maskaxeed, Jidheed iyo lab-Lakacooda.

Mabaadida Barashada	Xeeladdaha ay Bareyaashu u adeegsan karaan Hirgelinta Mabaadi,daas.
<p><u>Kelinimada iyo Iskaashiga</u> Khibraddaha Barashadu waa in ay Ardayda ku dhiirigelisaa in ay wax u bartaan si keli-keli ah iyo si Iskaashi ah labadaba.</p>	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Naqshadaynta khibraddo Barasho oo Ardayda u ogolaanaya in Qaar ka mid ah ay ku kala duwanaadaan habka ay wax u baranayaan iyo Habka ay ugu siqayaan hawlgallada xisaabta. ▪ Naqshadaynta khibraddo Barasho oo ardayda u ogolaanaya in ay si Iskaashi ah ardayda kale uga wada shaqeeyaan xisaabta.
<p><u>Goob Deggan oo Taageero leh</u> Habaynta /Qaabaynta Dugsiga iyo Fasalkuba waa in ay noqdaan kuwo xaqiijinaya Badbaadada Ardayda isla markaana ka Taageeraya Barashada Firfircoon.</p>	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Dhis Fasal badbaadsan oo u suurtagel in kara Ardayda Is-cisayn iyo isu dulqaadasho. ▪ Ku dhiirigeli Ardayda in qaataan Ismiidaaminta ku habboon ee xisaabta. ▪ Ku dhiirigeli Ardayda in ay si Firfircooni leh u aqoonsadaan Guulaha iyo Horu-kaca ay ka gaadheen xisaabta. ▪ Ku dhiirigeli Ardayda in ay qaataan in khaladaadkoodu uu yahay Fursaddo waxbaasho, Balse aan u ahayn calaamaddaha Guuldarada. ▪ Abaabul Axdi-Qarameedyada (policies) Dugsiga ee ka caawinaya Aragtida Fiican ee Dhinaca xisaabta.

Ujeeddooyinka Barashada

Xisaabta Fasalka

Ardaydu marka ay dhammeeyaan Xisaabta Fasalka 8aad kadib waa in ay Awood u yeelan karaan: _

- Fududaynta Tibaaxaha Al-Jabrada ah.
- Furfurista mas'alooyinka khuseeya Nolosha dhabta (xallinta Dhibaatooyinka Nolosha dhabta) ah iyaga oo adeegsanaya Doorsoomeyaasha.
- Iskudhufashada laba-Tibxaale lagu dhufanayo hal-Tibxaale iyo Laba-Tibxaale.
- Soo saarista Isir-weynaha ay wadaagaan Tibaaxaha Al-Jabrada ah.
- Furfurista Isle'egyada iyo Dheelliyada Toosan iyaga oo adeegsanaya xeerarka iskubedelidda.
- Sawiridda xarriiq ka dusta unugga (origin) oo Isle'egteeda la siiyey.
- Soo saaridda (Dhisidda) Isle'egta xarriiq Bar-kulannadeeda la siiyey.
- Soo saaridda Labajibbaarka iyo Saddexjibbaarka Tirooyinka.
- Soo saaridda xidid-Labajibbaarka iyo xidid – Saddex – Jibbaarka ee Tirooyinka Laba Jibbaaran iyo kuwa saddexjibbaaran sida ay u kala horreeyaan.

- Raadinta xidid – labajibbaarka Qiyaasta Tirada ugu dhow ee Tirooyinka, iyada oo adeegsanaya shaxda xidid-labajibbaarka Tirooyinka.
- Sheegidda xaaladdaha ay saddexagalladu ku noqon karaan saddexagallo isku mid ah.
- Adeegsiga Tijaabooyinka Isu-ekaanshaha (isku mid ahaanshaha) si ay u hubiyaan in laba saddexagal oo la siiyey ay isku mid yihiin (Isu egyihiin) iyo in kale.
- Muujinta xidhiidhka ay yeelan karaan xarriiqaha iyo Goobooyinka.
- Adeegsiga xaqiiqooyinka Aasaasiga ah ee ku saabsan xagal-xudduneedyada iyo xagal – Geesyada iyo xaglaha ay sameeyaan Boqonnada Isgoynaya si ay u Furfuraan mas’aloooyinka la xidhiidha.
- Sharxidda Dhacdo, muunadda – Dhacdo, iyo Itimaalka Dhacdooyinka Fudud.
- Xisaabinta Itimaallada Dhacdooyinka Fudud.
- Fahamka Fikraddaha (macnaha) aasaasiga ah ee ku saabsan saddexagallada Qumman.
- Dabba khidda Aragtiinnada muhiimka ah ee ku saabsan saddexagallada Qumman si ay ugu Furfuraan Mas’aloooyinka la xidhiidha Saddexagallada Qumman.
- Kasbashada Aqoonta mabaadi’da Aasaagiga ah ee saamiyada Tirignoomatariga.
- Dabbakhidda saamiyada Tirignoomatariga ah ee 30⁰, 45⁰ iyo 60⁰. si ay u furfur aan mas’aloooyinka la xidhiidha.
- Soo soocidda Qaybaha kala duwan ee Bayraamidhka iyo Toobinka.
- Diyaarinta Moodheellada Bayraamidhka iyo Toobinka.

Cutubka 1^{AAD}: Labajibbaarka, Xidid-Labajibbararka Saddexjibbaarka**Iyo Xidid – Saddexjibbaarka (20 Xisadood)****Ujeeddooyinka Guud ee Cutubkan:**

Cutubkani marka uu dhammaado kadib, Ardaydu waxay Awood u yeelan doonaan (Awood u yeelan karaan)

- Fahamka Macnaha Labajibbaarka iyo Xidid- Labajibbaarka, Saddexjibbaarka iyo xidid – Saddexjibbaarka.
- Soo saaridda xidid labajibbaarka Tirooyinka labajibbaaran.
- Raadinta Qiyaasta Tirada ugu dhow xidid – Labajibbaarka Tirooyinka, iyaga oo adeegsanaya shaxda xidid – labajibbaarka.
- Soo saaridda Saddex-Jibbaarka Tirooyinka.
- Soo saaridda xidid – Saddexjibbaarka Tirooyinka Saddexjibbaaran.

Ujeeddooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Barisharashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
<p>Ardaydu waa in ay Awood u yeelan kartaa:-</p> <ul style="list-style-type: none"> ▪ Soo saaridda Labajibbaarka Tiro 	<p>1.LABAJIB BAARKA , XIDID– LABAJIB BAARKA ;SADDEX JIBBAAR KA iyo XIDID – SADDEX JIBBAAR KA.</p> <p>1.1. Labajibbaarka Tirada (5 Xiso) Labajibbaarka Tirooyinka Lakabka leh.</p>	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Ku hoggaami Ardayda in ay Naqtiin ku sameeyaan iskudhufashada laba Tiro oo isku mid ah sida $2 \times 2 = 4$, $3 \times 3 = 9$, $4 \times 4 = 16$ Ka dibna ay xaqiijiyaan in Taasi tahay x^2 waayo $x \cdot x = x^2$ loona Akhriyo “x” kujibbaaran 2”. ▪ Ka caawi Ardayda in ay ka Fogaadaan Fahamka khaldan, kaas oo ah in a^2 ay tahay $2a$ laakiin ma aha <p>Tusaale : $3 \times 3 = 3^2$ (3 ku Jibbaaran 2) = $9 \times 5 = 5^2 = 25$ $7 \times 7 = 7^2 = 49$</p>	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Weydii aralayda in ay Tiraab ahaan Akhriyaan kuna siiyaan Macnaha Labajibbaarka Tirooyinka.
<ul style="list-style-type: none"> ▪ Raadinta Labajibbaarka Tiro iyaga oo adeegsanaya shaxda Labajibbaarad 	<p>Adeegsiga Shaxda Qiimaha Labajibbaarka</p>	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Ku hoggaami Ardayda in ay soo gunaanadaan in Tiro labajibbaaran uu macnaheedu yahay Tiradaas lafteeda oo laba Jeer la isku dhuftay <p>Tusaale :-</p>	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Weydii Ardayda in ay soo saaraan labajibbaarka Tirooyinka iyaga oo adeegsanaya:- b)Taranta Tirada

Ujeeddooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
a		$5^2 = 5 \times 5 = 25$ <ul style="list-style-type: none"> ▪ Ka caawi Ardayda in ay labajibbaarka Tiro ka raadiyaan shaxda labajibbaarka Tirooyinka. Tusaale : Raadi Labajibbaarka 4.72 1. Jog-u- Taxa “x” hoosteeda ka Raadi 4.7 2. Jiif-u-Taxa, 4.7 uga dhaqaaq dhinaca midig ilaa aad gaarto Tirada 2. 3. Akhri Tirada halkaas ku qoran waa 22.28. Haddii aad labajeer isku dhufato 4.72 waxa aad helaysaa $(4.72)^2 = 4.72 \times 4.72 = 22.2784$ <ul style="list-style-type: none"> ▪ Ka caawi Ardayda in ay ku soo gabagabeeyaan in Natiijada ay shaxda ka haleen ay tahay Qiyaasta Tiimaha ugu dhow oo loo qoray Tirada ay xisaabin ayeen. Tusaale ahaan $(4.72)^2 = 22.2784 \approx 22.28$ 	oo laba Jeer la isku dhuftay. t) Ka Raadinta shaxda Qiimaha labajibbaarada Tirooyinka.
<ul style="list-style-type: none"> ▪ Qeexidda xidid-labajibbaarka Tirooyinka Lakabka leh ee aan Tabanaha ahayn (Tirooyinka lakabka leh ee Togan iyo “0”) ▪ Saaridda xidid-labajibaarka Tirooyinka Labajibbaaran 	2.2. Xidid - labajibbaarka Tirooyinka Lakabka leh (8 Xiso) Xidid – Labajibbaarka Tirooyinka Labajibbaaran.	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Ka bilow casharkan Naqtiimidda labajibbaaridda Tiro. ▪ Ka caawi Ardayda in ay sharrax ka bixiyaan xidhiidhka ka dhexeeya Labajibbaaridda Tirada iyo ka saaridda xidid-Labajibbaarka Tiradaas, iyaga oo adeegsanaya Tusaaleyaal kala duwan sida b) $2^2 = 2 \times 2 = 4$ \therefore xidid – Labajibbaarka 4 waa 2 t) $3^2 = 3 \times 3 = 9$ \therefore xidid – Labajibbaarka 9 waa 3 J) $5^2 = 5 \times 5 = 25$ \therefore xidid – Labajibbaarka 25 waa 5	

Ujeedooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Barisharashada iyo Qalabyada loobaahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
		<ul style="list-style-type: none"> ▪ Ku hoggaami Ardayda in ay gaadhaan Gunaanadka ah in Raadinta xidid-Labajibbaarka Tirooyinku ay tahay Lidka ama Rogaalka labajibbaarka Tirada. ▪ Fursad u sii Ardayda in ay xidid-Labajibaarka Tiro u qeexaan sedan soo socota. Haddii “y” ($y \geq 0$) ay tahay Labajibbaarka “X” ($x \geq 0$) markaa “x” waxaa la yiraahdaa xidid-labajibbaarka “y” waxaana sumad ahaan loo Qorikaraa sedan $x^2 = y \Leftrightarrow x = \sqrt{y}$. ▪ Ku hoggaami Ardayda in ay Isirraynta mutuxan u adeegsadaan Raadinta xidid-Labajibbaaraka Tirooyinka labajibbaaran. Waxa aad Adeegsan kartaa Tusaaleyaal kala duwan oo la mid ah kan Tusaale :- Raadi (ka saar) $\sqrt{196}$ $196 = 2 \times 2 \times 7 \times 7$ Habee Isirrada 196. 196 waa Taranta laba urur oo isku mid ah oo Isirromutuxan ah $196 = (2 \times 7) \times (2 \times 7)$ $196 = 14 \times 14 = 142$ $\therefore \sqrt{196} = \sqrt{14^2} = 14$ Xusuusin:- Shaxda labajibbaarka Tirooyinka iyo shaxda xidid-labajibbaarka Tirooyinka waa in ay ku Jiraan Buugta Ardayda. 	
<ul style="list-style-type: none"> ▪ Ka saaridda xidid-Labajibbaarka Tirada iyaga oo adeegsanaya shaxda xidid- 	<ul style="list-style-type: none"> Adeegsiga shaxda xidid – Labajibbaarka. 	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Ka caawi Ardayda in ay sharrax ka bixiyaan Dariiqooyinka (Tallaabooyinka) lagaga saaro xidid-Labajibbaarka Tirada iyaga oo ka Akhrinaya shaxda xidid-Labajibbaarka Tirooyinka. 	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Sii Ardayda su’aalo ku saabsan habka shaxda xidid-Labajibbaarka looga. Raadiyo (saaro) Tirada.

Ujeedooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanad a Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
Labajibbaarka Tirooyinka Lakabka leh.		<p>Tusaale :- Ka saar xididka $\sqrt{24.50}$</p> <ol style="list-style-type: none"> 1. Ku hag Ardayda in ay shaxda xidid 2. Labajibbaarka ka Raadiyaan 24.50. 3. ka caawi Ardayda in ay Jiif-u-Taxa Tiradaas 24.50 uga dhaqaaqaan dhinaca bidix ilaa ay gaadhaan Tirada ah 4.9 kuwaas oo ah labada God ee ugu horreeya xidid-Labajibbaarka 24.50. 4. si ay u soo saaraan godka 3aad, u horsed Ardayda in ay ka bilaabaan 24.50, kadibna u dhaqaaqaan Joog-u-Taxeeda dhinaca kore ilaa ay gaadhaan 5 sidaas awgeed $\sqrt{24.50} = 4.95$ <ul style="list-style-type: none"> ▪ Fursad u sii ardayda in aysheegaan in haddii tirade la siiyey ay waayaan shaxda la siiyey ay qaataan xidid-Labajibbaarka Tirada ugu dhow Tirada la siiyey ee laga heli karo shaxdaas. <p>Tusaale : Raadi $\sqrt{9.950}$</p> <ol style="list-style-type: none"> 1. Ku hoggaami Ardayda in ay shaxda ka raadiyaan Tirada la siiyey oo ah 9.950, Maadaama aan ay shaxdaas ka heli Karin Tiradaas, ka caawi in ay Raad iyaan labada Tiro ee ugu dhow Tiradaas, hal Tiro oo dhinaca midig ah iyo hal Tiro oo dhinaca bidix ah Taas macnaheedu waxaa weeye $9.922 < 9.950 < 9.986$. 2. Ka caawi Ardayda in ay Go'aamiyaan labadaas Tiro tan ugu dhow Tirada la siiyey. 	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Weydii Ardayda in ay soo saaraan xidid – Labajibbaarka Tirada iyaga oo adeegsanaya shaxda xidid-Labajibbaarka Tirooyinka.

Ujeedooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Barisharashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta																				
		<p>Haddaba Tirada ugu dhow waa 9.922. $\sqrt{9.950} \approx \sqrt{9.922} = 3.15$</p> <ul style="list-style-type: none"> Ku hoggaami ardayda in ay xidid-Labajibbaarka Tirada ka weyn 100 ku Raadiyaan Habkan soo socda:- $\begin{aligned} \text{Tusaale ahaa } \sqrt{2841} &= \\ &= \sqrt{28.41 \times 100} \\ &= \sqrt{28.41} \times \sqrt{100} \\ &= 5.33 \times 10 = 53.3 \end{aligned}$ <p>Xusuusin: Ka caawi Ardayda in ay Tirada la siiyey u Qoraan Taranta Dhufsaneyaasha 100 iyo Tiro kale.</p>																					
<ul style="list-style-type: none"> 	<p>1.3. Saddexjibbaarka iyo xidid-Saddex-Jibbaarka Tiro (7 Xiso)</p>	<ul style="list-style-type: none"> 	<ul style="list-style-type: none"> 																				
<ul style="list-style-type: none"> Qeexidda saddexjibbaarka Tirada. Soo saaridda saddexjibbaarka Tirada 	<p>1.3.1. Sadde xjibbaar ka Tirada.</p>	<ul style="list-style-type: none"> Ka caawi Ardayda in ay naqtiin ku sameeyaan a^3 macnaheedu in uu yahay $a \times a \times a$ ($a^3 = a \times a \times a$) isla markaana la yiraahdo “a ku jibbaaran 3” ama “a saddexjibbaaran”. Ku hoggaami Ardayda in ay Raadiyaan saddexjibbaarka Qaarka mid ah Tirooyinka idil iyaga oo adeegsanaya shax sida soo socda. <table border="1" data-bbox="675 1503 863 1563"> <tr> <td></td><td></td><td></td><td></td><td></td><td></td><td></td><td></td><td></td><td></td> </tr> <tr> <td></td><td></td><td></td><td></td><td></td><td></td><td></td><td></td><td></td><td></td> </tr> </table> <ul style="list-style-type: none"> Fursad u sii Ardayda in ay Go'aamiyaan in marka la soo saarayo saddex jibbaarka Tiro ay tahay Tiradaas oo saddex 																					<ul style="list-style-type: none"> Weydii aradayda in ay soo saaraan saddexjibbaarka Tirooyinka (kuwaas oo ay ku Jiraan Qaar ka mid ah Jajab yada iyo Jajab-Tobanleyaasha Fudud)

Ujeedooyinka a gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Barisharashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
<ul style="list-style-type: none"> ▪ Qeexidda xidid-saddexjibbaarka ▪ Tirade saaridda xidid-Saddexjibbaarka Tirooyinka saddexjibbaaran 	1.3.2. Xidid-Saddexjibbaarka Tiraada	<p>Jeer la isku dhufatay.</p> <ul style="list-style-type: none"> ▪ Ka caawi Ardayda in ay Raadiyaan saddexjibbaarka Tiro kadibna ay Raadiyaan weydaarkeeda oo ah xidid-Saddexjibbaarka isla Tiradii. <p>Tusaale :- $53 = 5 \times 5 \times 5 = 125$ saddexjibbaarka 5 waa 125 xidid-saddexjibbaarka 125 waa 5 waayo $5 \times 5 \times 5 = 125$</p> <ul style="list-style-type: none"> ▪ Ku dhiirigeli Ardayda in xidid-saddexjibbaarka Tiro ay u Qeexaan in uu yahay Isir ka mid ah Taranta saddex isir oo isku mid ah oo la isku dhufataya. ▪ Ka caawi Ardayda in ay Qoraan sumadda xidid-Saddexjibbaarka oo ah “$3\sqrt{\quad}$” <p>Tusaale ahaan $3\sqrt{8}$ waxaana loo akhriyaa “xidid – Saddexjibbaarka 8”</p> <ul style="list-style-type: none"> ▪ Ku dhiirigeli Ardayda in ay xidid-Saddexjibbaarka ka saran Tirooyinka Saddexjibbaaran. <p>Tusaale :-</p> $3\sqrt{27} = \sqrt[3]{3 \times 3 \times 3}$ $1) \quad = \sqrt[3]{3^3} = 3 \quad 2)$ $3\sqrt{\frac{64}{125}}$ $= \frac{\sqrt[3]{64}}{\sqrt[3]{125}} = \frac{\sqrt[3]{4 \times 4 \times 4}}{\sqrt[3]{5 \times 5 \times 5}} =$ $\frac{\sqrt[3]{4^3}}{\sqrt[3]{5^3}} = \frac{4}{5}$ <ul style="list-style-type: none"> ▪ Ka caawi ardayda in ay ka shaqeeyaan Mas’aloyinka la xidiidha xidid-saddexjibbaarka <p>Tusaale:-Haddii mugga</p>	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Sii Ardayda laylisiyo ah soo saaridda xidid-Saddexjibbaarka Tirooyinka (Tirooyinka saddexjibbaaran) kana hubi shoqadooda. ▪ Weydii Ardayda in ay Adeegsada sumadda xidid-saddexjibbaarka ee ah “$3\sqrt{\quad}$” una Adeegsadaan si sax ah.

Ujeedooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Barisharashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
		<p>saddexjibbaarane uu yahay 8m^3, Raadi dhererka cidhifyadiisa.</p> <p>Si aad u Raadiso dhererka cidhifyada 8 u Tibaax Taranta 3 Isir oo isku mid ah kadibna mid qaado</p> $\sqrt[3]{8\text{m}^3}$ $= \sqrt[3]{25\text{m} \times 25\text{m} \times 2\text{m}} \therefore \text{Dhere}$ $= 2\text{m}$ <p>rka cidhif kasta oo ka mid ah cidhifyada saddexjibbaaranahaasi waa 2m.</p>	

CUTUBKA:2^{aad} :ADEEGSIGA DOORSOOMEYAASHA(25 XISADOOD)**Ujeeddooyinka Guud ee Cutubkan:**

Cutubkani marka uu dhammaado kadib, Ardaydu waxay Awood u yeelan doonaan (Awood u yeelan karaan)

- Furfurista Mas'alooyinka la xidhiidha Nolosha iyaga oo adeegsanaya Doorsoomeyaasha.
- Soo saaridda Taranta Laba-Tibxaale lagu dhufanayo hal-Tibxaale iyo Laba-Tibxaale lagu dhufanayo Laba-Tibxaale kale.
- Soo saaridda Isir-Weynaha ay wadaagaan (I.W.M)

Ujeeddooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Barisharashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
<p>Ardaydu waa in ay Awood u yeelan kartaa:-</p> <ul style="list-style-type: none"> ▪ Adeegsiga Doorsoomeyaasha ee Tibaaxidda xidhiidka Aljabrada iyo Joomateriga 	<p>2. ADEEGSIGA DOORSOOMEY AASHA</p> <p>1.1. Tibxaha iyo Tibaaxaha Aljabrada ah (8 Xiso) Adeegsiga Doorsoomeyaasha ee Qaacidooyinka.</p>	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Ka caawi Ardayda in ay Naqtiin ku sameeyaan Fikradda (macnaha) Doorsoomeyaasha, Tibxaha iyo Tibaaxaha. ▪ Ku dhiirigeli Ardayda in ay Falanqeeyaan kaalinta ay Doorsoomeyaashu kaga Jiraan xisaabta iyaga oo adeegsanaya Tusaaleyaal. ▪ Ku hoggaami Ardayda in ay sharrax ka bixiyaan xidhiidhada xisaabeed iyaga oo ku macnaynaya Doorsoome. <p>Tusaale:- Bedka Laydiga. -Wareegga koorta</p>	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Weydii aralayda in ay weedh-xisaabeedyada Fudud u bedelaan Tibaaxo xisaabeed.
<ul style="list-style-type: none"> ▪ Fududaynta Tibaaxaha Aljabrada ah eel eh bilaha iyo kuwaan Bilaha lahayn 	<p>Doorsoomeyaasha Tibxaha iyo Tibaaxaha</p>	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Fursad u sii Ardayda in ay Naqtiin ku sameeyaan Macnaha Tibxaha isku midka ah iyo Tibxaha aan isku midka ahayn. ▪ Ku hoggaami Ardayda in ay Fududeeyaan Tibaaxaha Aljabrada ah ee la siiyey iyaga oo isu ururinaya Tibaxaha isku midka ah. <p>Tusaale :- Fududee $5x + y - 3x + 2y$ “5x” iyo “3x” waa Tibxo isku mid ah oo</p>	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Sii Ardayda laylisyo ku saabsan Fududaynta Tibaaxaha Aljabrada ah eel eh Bilaha.

Ujeedooyin ka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Barisharashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
		leh $5x - 3 = 2x$ “y” iyo “2y” waa tibxo isku mid ah oo leh $y + 2y = 3y$ $\therefore 5x + y - 3x + 2y = 2x + 3y$	
<ul style="list-style-type: none"> Furfurista Mas’alooyin ka la xidhiidha Nolosha, iyaga oo adeegsanaya Doorsoomeyaasha. 	U Adeegsiga Doorsoomeyaasha Furfurista Mas’alooyinka	<ul style="list-style-type: none"> Ka caawi Ardayda in ay Furfur aan Mas’alooyinka la xidhiidha Nolosha, iyaga oo adeegsanaya Doorsoomeyaal. <p>Tusaale: Saddex Arday ayaa waxay Qaybsadeen Lacag dhan 3600 Birr. Haddii laba ka mid ah ay Qayb u heleen lacag Isle’eg, Ardayga 3aadna uu 600 Birr dheeryahay labada Arday ee kale. Markaa Raadi Qaybta uu Arday kasta qaatay?</p> <p>Furfuris:- ka soo qaad lacagta uu Qaybta u helay mid ka mid ah labada Arday in ay tahay “x”. markaa lacagta uu Qaybta u helay Ardayga 3aad waa $x + 600$. sidaas awgeed</p> $x + x + (x + 600) = 3600$ $3x + 600 = 3600$ $3x + 600 - 600 = 3600 - 600$ $3x = 3000$ $\frac{3x}{3} = \frac{3000}{3}$ $x = 1000$ <p>\therefore Labada Arday, Arday kasta wuxuu Qayb u helay 1000 Birr, Ardayga 3aadna wuxuu qayb u helay 1600 Birr.</p>	<ul style="list-style-type: none"> Sii Ardayda Laylisyo ku saabsan Mas’alooyinka la xidhiidha Nolosha dlabata ah ee loo Tibaaxi karo Doorsoomeyaasha.
<ul style="list-style-type: none"> Soo saaridda Taranta Hal-Tibix iyo Laba-Tibxaale 	2.2. Isku dhufashada Laba-Tibxaaleyaasha (7 Xiso) 2.2.1. Iskudhufashada Hal-Tibix iyo laba -	<ul style="list-style-type: none"> Ku dhiirigeli Ardayda in ay Fududeeyaan Tibaaxaha Aljabrada ah Tusaale ahaan. 1) Fududee $4(x + 3) - 4(x + 3)$ macnaheedu	<ul style="list-style-type: none"> Sii Ardayda Laylisyo shaqo Fasal iyo shaqo Guri ah oo ku saabsan soo saaridda

Ujeedooyin ka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
	Tibxaale	<p>waxaa weeye “$x + 3$” oo afar Jeer la isugeeyey. $4(x+3) = (x+3)+(x+3)+(x+3)+(x+3)$</p> <p>2) Fududee $2x(3y - 5x)$ $2x(3y - 5x) = (2x)(3y) - (2x)(5x) = 6xy - 10x^2$</p> <p>3) Fududee $8x(4y + 3x)$ $8x(4y + 3x) = (8x)(4y) + (8x)(3x)$ $= 32xy + 24x^2$</p> <ul style="list-style-type: none"> ▪ Ku hoggaami Ardayda in ay gaadhaan Go'aankan ah. $a(b + c) = ab + ac$ 	Taranta Hal-Tibxaale Adaguna ka hubi shaqadooda.
<ul style="list-style-type: none"> ▪ Soo saaridda Taranta Laba-Tibxaale lagu dhuftay laba-Tibxaale kale 	Iskudhufashada Laba Labo-Tibxaale.	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Ku hoggaami Ardayda in ay soo saaraan Taranta laba laba-Tibxaale, iyaga oo adeegsanaya xeerka kala dhigidda Isku dhufashada ee Isugeynta $(a + b) \times (c + d) = a \times c + axd + b \times c + b \times d$ ▪ Ku hag Ardayda in ay Fududeeyaan Taranta labada lab-Tibxaale. Tusaale :- $(2x - y)(5m - 3n) = (2x)(5m) - (2x)(3n) - (y)(5m) + (y)(3n)$ $= 10xm - 6xn - 5yn + 3yn$ Tusaale: $(3a + 4b)(2ab - 5a^2) = (3a)(2ab) - (3a)(5a^2) + (4b)(2ab) - (4b)(5a^2) = (6a^2b - 15a^3 + 8ab^2 - 20a^2b) = 6a^2b - 15a^3 + 8ab^2 - 20a^2b = -14a^2b - 15a^3 + 8ab^2$ 	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Sii Ardayda Laylisyo ku saabsan soo saaridda Taranta Laba Labo-Tibxaale.
<ul style="list-style-type: none"> ▪ Raadinta Isirweynaha ay wadaagaan Tibaaxaha Alijabmada ah. ▪ Isirraynta 	2.3. Isir –weynaha ay wadaagaan (10 Xiso)	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Ka caawi Ardayda in ay soo saaraan Isirweynaha awadaagaan (i.W.M) Tibaaxaha Aljabrada ah, iyaga oo raacaya Habkan soo socda:- Tusaale: Raadi Isirweynaha ay wadaagaan. 	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Weydii Aradyda in ay Tibaaxaha la siiyey ka saaraan Isirka ah Isirweynaha ay wadaagaan ee suurtagalka ah.

Ujeedooyin ka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Barisharashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
Laba-Tibxaaleyaa sha		<p>1) $2a^2x$ iyo $6a^3y^2x^5$ isbar bardhig doorsomeyaasha isku midka ah, kadibna qaado isirka ay wadaagaan.</p> <ul style="list-style-type: none"> - Isir-weynaha ay wadaagaan 2 iyo 6 waa 2 - Jibbaarka ugu weyn ee ay wadaagaan ee Isirka "a" waa a^2 - Jibbaarka ugu weyn ee ay wadaagaan ee Isirka "x" waa "x". - Laakiin "y" ma wadaagaan labada Tibxood. <p>\therefore Isirweynahay wadaagaan $2a^2x$ iyo $6a^3y^2x^5$ waa <u>$2a^2x$</u></p> <p>2) $ax + ay$ iyo $bx + by$ $ax + ay = a(x + y)$ $bx + by = b(x + y)$ \therefore Isir -weynaha ay wadaagaan waa "x + y"</p> <p>3) Isirree $x^2 - 3x$ Isir-weynaha ay wadaagaan x^2 iyo $3x$ waa x $\therefore x^2 - 3x = x(x - 3)$</p>	

CUTUBKA:3^{aad}: ISLE'EGYADA IYO DHEELLIYADA TOOSAN**(30 XISADOOD)****Ujeeddooyinka Guud ee Cutubkan:**

Cutubkani marka uu dhammaado kadib, Ardaydu waxay Awood u yeelan doonaan (Awood u yeelan karaan)

- Fahamka Fikradda (macnaha) Isle'egyada iyo Dheelliyada.
- Kobcinta xirfaddahooda ku saabsan Habaynta iyo Furfurista Isle'egyada iyo Dheelliyada Toosan.
- Adeegsiga xeerarka Iskubedelidda Isle'egyada iyo Dheelliyada si loogu Furfuro Mas'alooyinka.
- Sawiridda xarriiq Toosan oo ka dusta unugga (origin) Taas oo Isle'egteeda la siiyey.

Ujeeddooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
<p>Ardaydu waa in ay Awood u yeelan kartaa:-</p> <ul style="list-style-type: none"> ▪ Furfurista Isle'egyada Toosan ee Bilaha leh, iyaga oo adeegsanaya Isku bedelidda Isle'egyada isudhigma. 	<p>3. ISLE'EGYADA IYO DHEELLIYADA TOOSAN</p> <p>1.1. Furfurista Isle'egyada Toosan (10 Xiso) Furfurista Isle'egyada Toosan ee ilaha leh.</p>	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Ka caawi Ardayda in ay Naqtiin ku sameeyaan Furfurista Isle'egyada Toosan iyaga oo adeegsanaya Iskubedelidda Isle'egyada Isudhigma. ▪ Ku hoggaami Ardayda in ay Falanqeyaan xeerarkan soo socda ee naya Tusaaleyaal dhawr ah. <ul style="list-style-type: none"> 1) $a + (b + c) = a + b + c$ 2) $a - (b + c) = a - b - c$ ▪ Ku dhiirigeli Ardayda in ay xeerarkaas kor ku qoran ku dabbakhaan Furfurista Isle'egyada Toosan. Waxa aad adeegsan kartaa Tusaaleyaal sida. $2x - (x + 2) = 1$ $2x - x - 2 = 1 \text{ -----(ka saarista Bilaha)}$ $2x - 2 = 1$ $x = 3$ ▪ Ka caawi 	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Sii Ardayda Laylisyo ku saabsan Furfurista Isle'egyada Toosan ee Bilaha leh. Kadibna Hubi Jawaabahooda.

Ujeedooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
		<p>▪ Ardayda in ay dhuuxaan (Bartaan) Fikradda (macnaha) u Horsanaanta iyo isu ururinta Tibxah isku midka ah ee Fududaynta iyo furfurista Isle'egyada Toosan. Waxa aad adeegsan kartaa Tusaaleyaal sida:-</p> <p>Tusaale : $3(2x + 1) = 2x + 7$ $6x + 3 = 2x + 7$ ----- (ka saarista Bilaha) $6x - 2x = 7 - 3$---- (Isu ururinta Tibxaha</p> <p style="text-align: center;">Isku</p> <p>midka ah) $4x = 4$ $X = 1$</p>	
<p>▪ Furufista Isle'egyada Toosan ee Jajbyada leh.</p>	<p>Furfurista Isle'egyada Toosan ee Jajbyada leh</p>	<p>▪ Ku bilow casharkan Naqtiimidda Afarta Xisaabtal ee Jajabyada</p> <p>▪ Ku xiisageli Ardayda in ay si Ficil Isle'egyada Toosan ee ay ku Jiraan Jajabyadu. Waxa aad Adeegsan kartaa Tusaaleyaal kala duwan sida:-</p> <p>1) Furfur $\frac{3}{4}x - 2 = \frac{1}{2}$</p> <p>$4(\frac{3}{4}x - 2) = \frac{3}{4}(4)$ -Labada dhinac kaga</p> <p>Dhufo Dh.y.w Hooseeyyaashu) $3x - 8 = 2$ ----- Fududayn</p> <p>$3x = 10 \Rightarrow x = \frac{10}{3}$</p> <p>2) Furfur $\frac{2}{3}x + \frac{1}{2} = \frac{3x - 5}{6} =$</p> <p>$6(\frac{2}{3}x + \frac{1}{2}) = (\frac{3x - 5}{6})6$</p> <p>$4x + 3 = 3x - 5$</p>	<p>▪ Weydii Ardayda in ay Furfuraan Isle'egyada Toosan ee Jajabyada leh.</p>

Ujeeddooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
		$4x - 3x = -5 - 3$ $x = -8$	
<ul style="list-style-type: none"> ▪ Furfurista weedh-xisaabeedyada ku saabsan Noloshahabta ah iyada oo la adeegsanayo Isle'egyada Toosan. 	<p>Furfurista Mas'alooyinka, iyada oo la adeegsanayo Isle'egyada Toosan.</p>	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Ka caawi Ardayda in ay soo bandhigaan Tallaabooyinka lagu furfuro weedh – xisaabeedyada iyada oo la adeegsanayo Isle'egyada Toosan. Ku waas oo kala ah:- <ol style="list-style-type: none"> 1) Si Fiican u Fahan masalada 2) Taxdhammaan xaddiyada aan la aqoon eek u jira Masalada adiga oo adeegsanaya Doorsoomeyaal (sida 'x', 'y', z, a, b, IWM) 3) Dhis (Deji) Isle'eg muujinaysa xidhiidhka ka dhexeeya xaddiyada lagu siiyey iyo xaddiyada lagu weydiiyey. 4) Furfuri Isle'egta aad dhistay. 5) Hubi Natijada aad soo saartay 6) Ka Jawaab su'aasha/su'aalaha lagugu weydiiyey Masalada. ▪ Ku dhiirigeli Ardayda in ay si ficil ah ugu celceliyaan Furfurista weedhxisaabeedyada ku wajahan Laamaha kala duwan ee xisaabta iyo Nolol-Maal meedka sida Arimaha kala ah:- wax-soo-saarka, cashuuraha, Bangiyada, maaliyada, maalgelinta, HIV/AIDS IWM. 	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Sii aradyada laylisyo ku saabsan Noloshahabta ah sida wax-soo-saarka, cashuuraha kaydka, HIV/AIDS I.W.M.
<ul style="list-style-type: none"> ▪ Adeegsiga saxda ah ee calaamaddaha Dheelliga “≥” “≤” ee ku sunaya Furfurista. 	<p>3.2. Furfurista Dheelliyada toosan (10)</p>	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Fursad u sii Ardayda in ay naqtiin ku sameeyaan Furfurista Dheelliyada Toosan eel eh Doorsoomeyaal horgalahoodu Togan yahay. 	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Weeydii Ardayda in ay Furfuraan dheelliyada Toosan eel eh Doorsoomeyaal horgalahoodu Taban yihiin kadibna ka Hubi

Ujeedooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
<p>▪ Furfurista Dheelliyada leh Horgale Taban iyaga oo adeegsanaya xeerarka Iskubedelidda Dheelliyada isu dhisma.</p>	<p>Xiso)</p>	<p>▪ Marka aad barto calaamaddahan “\geq” iyo “\leq” kadib ka caawi Ardayda in ay ku jiraan calaamadahaasi. Waxa aad Adeegsan kartaa Tusaaleyaal sida.</p> <p>Tusaale: Furfur Dheelliyadan soo socda Halka $x \in W$.</p> <p>1) $x + 3 > 4$ 2) $x + 3 \geq 4$</p> $x + 3 - 3 > 4 - 3 \quad x + 3 - 3 \geq 4 - 3$ $x > 1 \quad x \geq 1$ <p>Furfuristeedu waa Furfuristeedu 2, 3, 4, 5, Waa 1, 2, 3, 4, 5, ..</p> <p>▪ Ka caawi ardayda in ay la yimaadaan xeerka lagu Furfuro dheelliyada Toosan kaas oo ah “Haddii Tiro Taban oo isku mid ah Dheelliga labadiisa dhinacba lagu dhufto ama loo qayb iyo markaa calaamaddi Dheelligu waa isbedelaysaa waxayna noqonaysaa Lidkeeda, iyaga oo adeegsanaya Tusaaleyaal dhawr ah waxa aad adeegsan kartaa Tusaaleyaal sida:</p> $2 < 3 \text{ ama } 9 > 6$ $(-1) (-2) > (-1) (3) \text{ ama } -2 > -3 \text{ ama } \frac{9}{-3} < \frac{6}{-3}$ $-3 < -2$ <p>▪ Ku dhiirigeli Ardayda in ay Furfurista Dheelliyada Toosan ku dabbakhaan xeerkaas kor ku xusan sida.</p> $-2x \geq x + 6$ $-3x \geq 6 \text{ ----- Ka goo "x"}$	<p>shaqadooda.</p>

Ujeedooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta																						
		Dheelliga labadiisa Dhinacba. $\frac{-3x}{-3} \leq \frac{6}{-3} \quad \text{--u qaybi } -3$ labada dhinacba $x \leq -2$																							
<ul style="list-style-type: none"> ▪ Sawiridda Afarta waaxdoo ee sallaxa Dhidibbada kaarti iyo muujinta unugga (origin) dhidibka “x” iyo Dhidibka “y”. ▪ Ku meelaynta Baraha la siiyey sallaxa Bar-kulannada kartis. ▪ Akhrinta Barkulannada Bar kasta oo ku taal sallaxa Bar-kulannada kaartis. 	3.3. Hab-Dhiska Dhidibbaa da Kaartis. (10 Xiso) 3.3.1. Afarta waaxood ee Bar-kulannada sallaxa ee kaartis.	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Fursad u sii Ardayda in ay Naqtiin ku sameeyaan Habka Fallaarta Tirada loogu Fid iyo xarriiqda Tirada. ▪ Ka caawi Ardayda in ay xaqiiqsadaan in dhidibka “x” iyo dhidibka “y” ay Afar waaxood oo isle’eg u qaybiyaan sallaxa Bar-kullanada. ▪ Ka Taageer ardayda in ay si Ficil ah ugu celceliyaan Habka Baraha loogu muujiyo sallax Bar-ku lannada (Dhidibbada Sallaxa) dushooda. ▪ Fursad u sii Ardayda in ay si Ficil ah ugu celceliyaan Akhrinta Bar-kulanada Bar aha ku muujisan dhidibbada sallaxa dushooda. ▪ Ku hoggaami Ardayda in ay Qeexaan calaamaddaha lammaaneyaasha Horsan (xiy) ee Bar-kulannada waax kasta. Sida ka muuqata sawirkan soo socda:- 	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Weydii Ardayda in ay soosaaraan Bar-kuanka Baraha lasiiyey. ▪ Weydii Ardayda in ay Akhriyaan Bar-kulanka Bar kasta oo Dhidibbada sallaxa dushooda. 																						
		Waaxda 2aad																							
<ul style="list-style-type: none"> ▪ Sawiridda xarriiqaha Toosan ee Dhidibbada sallaxa ee Isle’egyada sansaantoodu tahay. → y = a 	3.3.2. Bar-kulannada iyo xarriiqda Toosan	<table border="1" style="margin-bottom: 5px;"> <tr> <td>X</td><td>-3</td><td>-2</td><td>-1</td><td>0</td><td>1</td><td>2</td><td>3</td><td>4</td><td>5</td><td>6</td> </tr> <tr> <td>Y</td><td>3</td><td>3</td><td>3</td><td>3</td><td>3</td><td>3</td><td>3</td><td>3</td><td>3</td><td>3</td> </tr> </table> <ul style="list-style-type: none"> ▪ Ku bilow casharkan sawiridda shaxda muujinaysa Qiimaha “x” iyo Qiimaha “y” Halka Qiimaha “y” uu yahay mid aan is bedelayn. Adiga oo Taas ka duwaya Fursad u sii 	X	-3	-2	-1	0	1	2	3	4	5	6	Y	3	3	3	3	3	3	3	3	3	3	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Weydii Ardayda in ay sawiraan xarriiqo ay Isle’eqo ay Isle’egyadoodu yihiin y = a (Xarriiq Jiifta) x = b (Xarriiq Taagan) y = mx (Xarriiq Janjeedha oo kadusta
X	-3	-2	-1	0	1	2	3	4	5	6															
Y	3	3	3	3	3	3	3	3	3	3															

Ujeedooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Barisharashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
<p>→ $x = b$ → $y = mx$</p> <ul style="list-style-type: none"> ▪ Soo saarida Isle'egyada a la xidhiidha Bar-kulannada Lammaan eyaasha Horsan ee la siiyey ▪ Soo saaridda Isle'egta xarriiqda marta 		<p>Ardayda in ay muujiyaan Barahaas, isla markaana ay xaqiiqsadaan dhacaan xarriiq Jiifta. Waxa aad qaadan kartaa Tusaaleyaal kala duwan sida Tusaalaha soo socda.</p> <ul style="list-style-type: none"> ▪ Ku dhiirigeli Ardayda in ay u Fiirsadaan xarriiqdan ah $y = 3$, isla markaana ay yiraahdaan $y = 3$ waa isle'egta xarriiqdaas. ▪ Ka caawi ardayda in ay Gaadhaan Go'aanka ah in $y = a$, halka $a \in Q$, ay tahay Isle'egta xarriiq jiifta (ama ay tahay xarriiq la barbarro ah dhidibka x). ▪ Ku dhiirigeli Ardayda in ay sawiraan xarriiqo ay Isle'egyadoodu yihiin sansaanta $y = a$, Tasaale ahaan Ha sawireen xarriiqahan. <p>b) $y = -1$ t) $y = 2$</p> <ul style="list-style-type: none"> ▪ Ka caawi Ardayda, iyaga oo Tallaabooyinka kore kuwo la mid ah ku sameynaya, xarriiqo Taagan, in ay Gaadhaan Go'aanka ah in $x = b$, Taagan (ama xarriiq la barbarro ah dhidibka y). ▪ Ku dhiirigeli Ardayda in ay sawiraan xarriiq Toosan oo Isle'egteedu tahay sansaanta $x = b$, haka $b \in Q$, Tusaale ahaan xar xarriiqaha Isle'egyadoodu yihiin. <p>b) $x = -3$ t) $x = 5$</p> <ul style="list-style-type: none"> ▪ Ku hoggaami Ardayda in ay Falanqeeyaan saamigalka Qumman ee laba xaddi "x" iyo "y", kadibna ka caawi 	<p>Orijinka halka $a, b, m \in Q$ ee sallaxa Bar-Kulanada ka dibna Hubi shaqadooda.</p> <p>Sii Ardayda urur Lammaaneyaala Horsan ah, kadibna weydii in ay Qoraan Isle'egta marta Bar-kulanada lammaaneyaashaas horsan ee la siiyey (Isle'egta loo baahan yahay waa in ay noqotaa Isle'eg Toosan).</p>

Ujeedooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta														
<p>Baraha Bar-kulannadooda la siiyey.</p>		<p>Ardayda in ay sawiraan xarriiqda Isle'egta sansaanteedu tahay $y = mx$, halka $m \in Q$ iyaga oo Falanqaynaya</p> <p>Tallaabooyinkan soosocda:-</p> <ol style="list-style-type: none"> 1. Samee shaxda Qiimaha "x" 2. Soo saar Qiimaha "y" adiga oo adeegsanaya Isle'egta lagu siiyey ee ah $y = mx$ ($m \in Q$) 3. Muuji Bar-kulanka Barha ay ku kulmaan dhidibka "x" iyo dhidibka "y" 4. Sawir xarriiq Toosan oo ka dusta dhammaan Baraha aad muujisay. <p>Waxa aad qaadan kartaa Tusaaleyaal la mid ah kan soo socda.</p> <p>Tusaale; - Sawir xarriiqda Isle'egteedu tahay $y = 3x$.</p> <table border="1" data-bbox="730 972 1090 1043"> <tr> <td>x</td> <td>-3</td> <td>-2</td> <td>-1</td> <td>0</td> <td>1</td> <td></td> </tr> <tr> <td>y</td> <td>-9</td> <td>-6</td> <td>-3</td> <td>0</td> <td>3</td> <td></td> </tr> </table> <ul style="list-style-type: none"> ▪ Ku dhiirigeli Ardayda in ay Gaadhaan Go'aanka ah in xarriiqda leh Isle'egta sansaanteedu tahay $y = mx$:- → waxay ka dustaa unugga (origin) → Tirada u Taagan "m" waxaa la yiraahdaa Tirada xarriiqda. → Fursad u sii in ay u Fiirsadaan Dabecaddaha xarriiqaha marka $m > 0$ iyo marka $m < 0$. ▪ Ka Taageer ardayda in ay Qoraan Isle'egta xarriiq kasta oo marta Baraha Bar-kulannadoodu yihiin Lammaanyaasha Horsan ee la siiyey. Yaal la mid ah Tusaalahan. <p>Tusaale:- Qor Isle'egta xarriiqda</p>	x	-3	-2	-1	0	1		y	-9	-6	-3	0	3		
x	-3	-2	-1	0	1												
y	-9	-6	-3	0	3												

Ujeedooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
		<p>marta Barahan lagu siiyey eek ala ah $(-2, -4)$, $(-1, -2)$, $(0, 0)$, $(1, 2)$, $(2, 4)$, $(3, 6)$</p> <p>→ waxay ku dul dhacaan xarriiq Toosan</p> <p>→ xarriiqdu waxay ka dustaanugga (origin)</p> <p>→ Lammaane kasta Qiimaha “y” waa laba Labka Qiimaha “x”</p> <p>Sidaas awgeed $y = 2x$ waa Isle’egta xarriiqdan</p>	

CUTUBKA:4^{aad} : ISU – EKAANSHAHA SHAXANNADA (25**XISADOOD)****Ujeeddooyinka Guud ee Cutubkan:**

Cutubkani marka uu dhammaado kadib, Ardaydu waxay Awood u yeelan doonaan (Awood u yeelan karaan)

- Aqoonsiga Fikradda (macnaha) Isu-Ekaanshaha shaxannada iyo Erey-Bixinta la xidhiidhaba.
- Fahamka shuruuddaha (xaaladdaha) ay saddexagalladu ku noqon karaan saddexagallo isu-eg.
- Adeegsiga Tijaabooyinka (Tallaabooyinka) lagu hubiyo Isu-ekaanshaha laba saddexagal.

Ujeeddooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
<p>Ardaydu waa in ay Awood u yeelan kartaa:-</p> <ul style="list-style-type: none"> ▪ Soosoocidda shaxannada isu-eg midba kan kale. ▪ Sharxidda macnaha Isu-ekaanshaha shaxannada 	<p>4. ISU – EKAANSHAHA SHAXANNADA</p> <p>4.1. Isu-ekaanshaha shaxannada sallaxa (8 Xiso) Sawiridda iyo Qeexidda isu-ekaanshaha shaxannada .</p>	<ul style="list-style-type: none"> ▪ U horsed Ardayda in ay Falanqeyaan macnaha Isu-ekaanshaha shaxannada , iyaga oo adeegsanaya Moodheellada shaxannada ama walxaha sida leh Qaab isku mid ah Balse xajmigoodu kala duwan yahay. <p>Ka caawi Ardayda iyaga oo koox-koox in ay sawiraan shaxanno Lammaan oo isu-eg oo kala duwan. Isla markaana ay keenaan Tusaaleyaal muujinaya Isu-ekaanshaha shaxannada ee Nolol-maalmeedkooda.</p>	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Weydii Ardayda in ay Fasalka keenaan shaxanno isawirro Nooca ay doonaan ha ahaadeene muujinaya Isu-ekaansho isla markaana weydii in ay sharrax ka bixayaan sida ay isugu eg yihiin.
<ul style="list-style-type: none"> ▪ Sawiridda shaxan ka ballaadhan shaxanka dhabta ah ee la siiyey, iyaga oo adeegsanaya Isirka Ballaadhinta (weynaynta). 	<p>Saamigallada iyo isir rada weyntaynta iyo yaraynta shaxan la siiyey.</p>	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Ka caawi Ardayda in ay Ballaadhiyaan ama yareeyaan shaxan la siiyey, iyaga oo adeegsanaya Isirrada weynaynta ama yareynta. ▪ Ka Taageer ardayda in ay Gaadheaan Go'aan yareyntu uu yahay ma doorsoome aan 	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Sii Ardayda Laylisyo ku saabsan weynaynta ama yareynta shaxannada.

Ujeedooyinka a gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris- barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyi nka Qiimeynta
<ul style="list-style-type: none"> ▪ Sawiridda shaxan ka yar shaxankii dhabta ahaa ee la siiyey iyaga oo adeegsanaya Isirka yareynta. 		<p>islbedelayn, isla markaana Qeexaya Gudboon (isku began) ee shaxanka Taas darterd saamiyadu waa kuwo Isle'eg oo sababaya saamigalnimada dhererrada dhinacyada Gudboon ee shaxankaas.</p>	
<ul style="list-style-type: none"> ▪ Sharxidda xaqiiqooyinka ku saabsan Isu-ekaanshaha laba saddexagal ▪ Adeegsiga (Dabbakhaadda) Qeexidda isu-ekaanshaha laba saddexagal. 	<p>4.2. Isu-ekaanshaha saddexagallada (17 Xiso) 4.2.1. Barashada saddexagal lada Isu-eg.</p>	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Ku bilow casharkan Naqtiimidda Afkaaraha muhiimka ahaa ee casharkii hore eek u saabsanaa Isirrada Weynaynta ama yareynta shaxannada iyo saamigalnimada Dhinacyada isku began (dhinacyada Gudboon) ee shaxannada isu-eg (khaas ahaan saddexagallada). ▪ Ku hoggaami Ardayda in ay Falanqeeyaan Isu-ekaan shaha laba saddexagal, isla markaana ku xiisageli ardayda in ay Isu-ekaan shaha laba saddexagal u Qeexaan sedan soo socota "Saddexagalka ABC wuxuu u egyahay saddexagalka DEF , Haddii Dhinacyada Gudboon ee labada saddexagal ay saamigal isu yihiin , Isla markaana xaglaha Gudboon ay isku sargo'an yihiin" Taas oo sumad ahaan noqonaysa Haddii $\Delta ABC \sim \Delta DEF$, 	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Weydii ardayda, oo Fursad u sii in ay Tiraab ahaan (oraah ahaan) kaga Jawaabaan , waa maxay macnaha Isirka weynaynta , Isirka yareynta, Dhinacyada saamigalka ah ee shaxannada isu-eg (khaas ahaan saddexagallada). ▪ Weydii Ardayda in ay Qeexidda ku dabbakhaan (u adeegsadaan) Furfurista

Ujeedooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
		<p>Markaa</p> $\frac{AB}{DE} = \frac{BC}{EF} = \frac{CA}{FD} = k \text{ iyo}$ $m(\hat{A}) \equiv m(\hat{D}), m(\hat{C}) \equiv m(\hat{F})$ $m(\hat{B}) \equiv m(\hat{E}),$ <p>Iyada oo la siinayo Faahfaahin dheer oo ku saabsan isku beegnaanta dhinacyada iyo xaglaha Labadaas saddexagal iyo Adeegsiga Sumadda Isuekaanshaha oo ah “~”.</p> <ul style="list-style-type: none"> ▪ Ku dhiirigeli Ardayda in ay Qeexiddaas ku dabbakhaan Furfurista mas’alooyinka sida:- Waxaa lagu siiyey in $\Delta BQR \sim \Delta MNT$, haddii $BQ = 2sm$, $QR = 5sm$, $MN = 4sm$ markaa Raadi Dhererka dhinaca NT? Furfuris :- $\frac{BQ}{MN} = \frac{QR}{NT}$ $\frac{2sm}{4sm} = \frac{5sm}{NT}$ $NT = 10sm$ 	<p>mas’alooyin ka la xidhiidha Isuekaanshaha laba saddexagal oo lasiiyey (In ay sheegaan in labada saddexagal ay isuegyihiin iyo in kale).</p> <ul style="list-style-type: none"> ▪ Hubi sida ay Ardaydu u adeegsanayaan summaddaha Isuekaanshaha oo ah “~” iyo Isku sargonaanta oo ah “≡”
<ul style="list-style-type: none"> ▪ Soo saaridda Isuekaanshaha laba saddexagal oo kasta iyaga oo adeegsanaya Tijaabooyinka Isuekaanshaha saddexagall 	<p>4.2.2. Tijaabooyinka Isuekaanshaha Saddexagallada.</p>	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Ka caawi Ardayda in ay xaqiiqsadaan in aanay lagama maarmaan ahayn Isbarbardhigidda Dhammaan Dhinacyada iyo xagalaha isku began ee labada saddexagal marka la hubinayo in ay labadaas saddexagal Isuegyihiin iyo in kale, isla markaana ay ku Filan tahay in la isbarbardhigo Qaybo ka mid ah 	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Sii Ardayda Mas’alooyin ka ku saabsan Tijaabooyinka lagu xaqiiiyo Isuekaanshaha saddexagallada kana hubi Jawaabahoo

Ujeeddooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
<p>ada ee kala ah “Dh,dh,dh”; “Dh,x,dh” iyo “x.x”.</p>		<p>Dhinacyada iyo xaglaha isku began ee labadaas saddexagal. Tusaale ahaan saamigalka saddexda dhinac ee isku began (Dh.dh.dh), Saamigalka laba dhinac oo isku began iyo isku sargo’naanta xagasha u dhexaysa labadaas dhinac (Dh.x.dh) iyo Isku sargo’naanta laba xaglood oo isku began (x.x).</p> <ul style="list-style-type: none"> ▪ Adiga oo Tusaale ahaan u qaadnaya Fursad u sii Ardayda in ay sababeeyaan mid ka mid Tijaabooyinkaas, ka soo qaad “Dh.dh.dh”. <ol style="list-style-type: none"> 1. Waxaa la gu siiyey saddexagal iyo Dhererrada saddexdiisa dhinacba. 2. Waxaa kale oo lagu siiyey Madoorsoomaha saamigalnimada “k”. <ul style="list-style-type: none"> ▪ Fursad u sii Ardayda in ay sawiraan Saddexagal u-eg saddexagal ka la siiyey iyaga oo ka Duulaya Qiimaha “k” (Ha noqdo mid ka ballaadhan-ka weyn ama mid ka yar) kadibna Fursad u sii in ay Hubiyaan in xaglaha isku began ee labadaas, saddexagal ay yihiin xaglo isku sargo’an iyaga oo ku cabbiraya xagal-Beeg. ▪ Ku dhiirigeli Ardayda in ay soo gabagabeeyaan 	<p>da.</p>



Ujeedooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
		<p>Isu-ekaanshaha laba saddexagal iyaga oo ka duulaya Qeexiddaas.</p> <ul style="list-style-type: none"> ▪ Labada Tijaabo ee hadhsan waxa aad kor ku Qoran (ka hor inta aanay Adeegsan Tijaabooyinka,, Fursad u sii Ardayda in ay wax kasta ku hubiyaan iyaga oo cabbiraya Qaybaha isku began ee saddexagallada). 	
<ul style="list-style-type: none"> ▪ Sharxidda xidhiidhka ay leeyihiin labada wareeg ee labada saddexagal ee Isu-eg. ▪ Sharxidda xidhiidhka ay Leeyihiin bededka labada saddexagal ee Isu-eg. 	<p>4.2.3. Wareegga iyo Bedka saddexagallada Isu-eg.</p>	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Fursad u sii Ardayda in ay Naqtiin ku sameeyaan Jidka lagu hela wareegga saddexagallada iyo Jidka lagu helo Bedka saddexagallada. ▪ Fursad u sii Ardayda in ay soo saaraan labada wareeg iyo labada Bed ee laba saddexagal oo isu-eg. Ka dibna ka caawi in ay Raadiyaan saamiga labada wareeg ee labadaas saddexagal iyo saamiga labada Bed ee labadaas saddexagal. ▪ Ka caawi Ardayda in ay Taas u soo gabagabeeyaan sedan soo socota “Saamiga Labada wareeg ee labadaas saddexagal ee Isu-eg wuxuu le’eg yahay saamiga Dhinacyadooda isku began”. Sidaas oo kale “Saamiga labada Bed ee labadaas saddexagal ee Isu-eg wuxuu le’eg yahay labajibbaarka saamiga Dhinacyadooda Isku began”. 	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Sii Ardayda layliso ku saabsan Raadinta wareegga iyo bedka laba saddexagal oo Isu-eg.

CUTUBKA 5^{aad} : GOOBOOYINKA (20 Xisadood)**Ujeeddooyinka Guud ee Cutubkan:**

Cutubkani marka uu dhammaado kadib, Ardaydu waxay Awood u yeelan doonaan (Awood u yeelan karaan)

- Si Fiican u sii kordhiyaan Fahamkooda ku saabsa Goobooyinka.
- Xaqiiqsashada xidhiidhka ka dhexeeya Xarriiqaha Toosan iyo Goobooyinka.
- Adeegsiga (Dabbakhidda) Xaqiiqooyinka Aasaasiga ah eek u saabsan xagal-xudduneedka iyo xagal-Geeska Goobada iyo Xagalaha ay sameeyaan Boqonno isgoynaya isla markaana ay xisaabiyaan (soo saaraan) Cabbirradooda.

Ujeeddooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
<p>Ardaydu waa in ay Awood u yeelan kartaa:-</p> <ul style="list-style-type: none"> ▪ Soosocidda Qaansada weyn iyo Qaansada yare e Goobada. ▪ Soo soocidda Fikraddaha “Sektorka” iyo “Sejmentiga” Goobada. ▪ Shaxidda Fikraddaha “Taabtaha” iyo “Tikraarka” Goobada. ▪ Muujinta xuddunta Goobada iyaga oo adeegsanaya Habka dhisidda. 	<p>5. GOOBOOYINKA</p> <p>5.1. Sii Kordhinta Barashada Goobooyinka (8 Xiso)</p> <ul style="list-style-type: none"> ▪ Qaybaha Goobada. ▪ Dhisidda xuddunta Goobada. 	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Fursad u sii Ardayda in ay Naqtiin ku sameeyaan Goobo, Gacanka, Dhexroorka, Boqonka iyo Wareegga (weegaarka) Goobada. ▪ Fursad u sii Ardayda in ay kala soocaan Qaansada weyn iyo Qaansada yare e Goobada iyaga oo adeegsanaya Tusaaleyaal kala duwan. ▪ Ka caawi Ardayda in ay soo bandhigaan sektarka iyo sejmentiga Goobada. ▪ Ku Hoggaami Ardayda in ay muujiyaan xidhiidhka suuragalka ah ee ka dhexayn kara Goobada iyo xaariiqda Toosan. Taas oo ah xarriiqda Toosan iyo Goobada xidhiidhkoodu wuxuu noqon karaa: ▪ Fursad u soo Ardayda in ay Dhuuxaan (sifiican u bartaan) Fikraddaha ama macnaha xarriiqaha ah “Taabtaha” iyo Tikraarka. Goobada. ▪ Ku hoggaami Ardayda in ay helaan (soo saaraan) 	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Weydii Ardayda in ay Magacaabaan Qaansada weyn, Qaansada yar, xarriiqda Taabtaha iyo xarriiqda Tikraarka ee Goobo la siiyey oo si cad u muujin aysa Qaybahaas. ▪ Sii Ardayda Mas’alooyin ku saabsan Raadinta xuddunta Goobada iyaga oo adeegsanaya Habka dhisidda Fudud.

Ujeeddooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
		<p>xuddunta Goobada, iyaga oo adeegsanaya Dhisidda Tallaabooyinka Fudud ee soo socda.</p> <p>→ Sawir Goobo, Adiga oo adeegsanaya shilin am akumi.</p>  <p>→ Sawir Boqonka AB ee Gobadaas</p>  <p>A————— B</p> <p>→ Dhis Qotomaha kala badha Boqonka AB .</p> <p>→ SAWir Boqon kale, kuna magacow CD.</p> <p>→ Dhis Qotomaha kala Badha Boqonka CD.</p> <p>▪ → Qotomaha kala badha AB iyo Qotomaha kala badha CD Barta ay iska gooyaan ku magacow “0”. Barta “0” waa xuddunta Goobadaas ee la Raadinayey.</p>	
<ul style="list-style-type: none"> ▪ Qeexidda (Soo soocidda) xagal – xuddunneedka iyo Xagal-Geeska Goobada. ▪ Xisaabinta (soo saaridda) Cabbirka xagal xuddunneedka 	<p>5.2. Xagalaha Goobada. (12 Xiso)</p> <p>5.2.1. Xagal-xuddunneedka iyo xagal-Geeska Goobada.</p>	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Ka caw ardayda in ay dhuuxaan macnaha “Xagal-Xuddunneed” iyo xidhiidhka ay la leedahay Qaansada Afsaarka u ah. Kadibna ku hoggaami Ardayda in ay Furfuraan Mas’alooyinka la xidhiidha. ▪ Ka caawi Ardayda in ay Dhuuxaan macnaha “Xagal-Gees”, kadibna ku dhiirigeli Ardayda in ay cabbiraan xagal-xuddunneedka iyo 	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Sii Ardayda Laylisyo ku saabsan xisaabinta Cabbirrada xagal-xuddunneedka, xagal-Geeska iyo Qaansada Afsaarka u ah ee la siiyey.

Ujeedooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
<p>ama Qaansada Afsaarka u ah iyaga oo ka duulaya Macluumaadka la siiyey.</p>		<p>xagal-Geeska Afsaarkoodu yahay Qaanso isku mid ah Isla markaana ay ku soo gabagabeeyaan in :-</p> <ol style="list-style-type: none"> 1. Cabbirka xagal-Geeska Goobadu waa badhka ($\frac{1}{2}$) cabbirka xagal-xudduneedka Goobadaas. 2. Cabbirka xagal-Geeska Goobadu waa Badhka (Nuska) cabbirka Qaansada Afsaarka u ah. <p>$m(\sphericalangle ABC) = \frac{1}{2} m(\sphericalangle AOC)$ $m(\sphericalangle ABC) = \frac{1}{2} m(\sphericalangle ADC)$</p> <ul style="list-style-type: none"> ▪ Fursad u sii ardayda in ay xidhiidhiyaan xaglo-Geesyada Goobada ee Afsaarkoodu yahay Qaanso isku mid ah (Hal Qaanso). Tusaale ahaan <p>$m(\sphericalangle ABE) = m(\sphericalangle ACE) = m(\sphericalangle ADE) = \frac{1}{2} m(\sphericalangle AXE)$</p>	
<ul style="list-style-type: none"> ▪ Caddaynta cabbirka xagasha ay sameeyeen Laba Boqon oo isyoynaya ee Goobada dhexdeeda wuxuu le'eg yahay Nuska wadarta cabbirka labada Qaanso ee labadaas Boqon. ▪ Furfurista mas'alooyin ka la xidhiidha 	<p>5.2.2. Xaglaha ka sameysan laba Boqon oo Isgoynaya.</p>	<p>Waxa lagu siiyey Goobadan kor ka muuqata, Haddaba ku hoggaami Ardayda in ay soo bandhigaan Tallaabooyinkan soo socda:-</p> <ol style="list-style-type: none"> 1. Isku xidh Barta "D" iyo Barta "C", Adiga oo adeegsanaya Mastarad. 2. Cabbir xagasha ACD iyo xagasha BDC iyaga oo adeegsanaya xagal-Beeg. 3. Iyaga oo ka duulaya Tallaabada 2aad weydii in ay Qoraan cabbirka Qaansada AD iyo cabbirka Qaanshada BC. 4. Cabbir xagasha BEC. 5. Xidhiidhi $m(\sphericalangle BEC)$ iyo wadarta $m(\sphericalangle AD)$ iyo 	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Weydii Ardayda in ay Dabbakhaan Qaacidada lagu siiyey Dhammaadka casharkan, Isla markaana Fursad u sii in ay hubiyaan Jawaabahooda iyaga oo adeegsanaya cabbirida.

Ujeedooyinka a gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris- barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
xagasha ay sameeyaan laba Boqon oo Isgoynaya Goobada dhexdeeda.		m(BC). Taas oo noqonaysa $m(\sphericalangle BEC) = \frac{1}{2} [m(AD) + m(BC)]$	
<ul style="list-style-type: none"> ▪ Qeexidda Afargeesleyaasha Meersan. ▪ Sharraxidda Astaanta Afargeeslaha meersa. ▪ Caddaynta ARagtiinka ku saabsan xaglaha Gudaha ee Iska soo horjeeda ee Afargeeslaha meersan. ▪ Soo saaridda (xisaabinta) cabbirka xagasha aan la aqoon ee Afargeeslaha meersan. 	5.2.3. Afargeesle yaasha Meersan.	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Fursad u sii in ay dhuuxaan Qeexidda afargeeslaha meersan, kadibna ku hoggaami in ay cabbiraan xaglaha iska soo Horjeeda ee Afargeeslaha meersan, isla markaana ay ku soo Gabagabeeyaan in xaglahaasi ay yihiin xaglo-isdhammaystira. ▪ Ka caawi Ardayda in ay caddeeyaan in xaglaha iska soo horjeeda ee Afarammaystira iyaga oo adeegsanaya Aqoontii ay ka heleen xagal –Geeska. ▪ Ku hoggaami Ardayda in ay Raadiyaan cabbiraadda xagalha Qarsoon (Aan la aqoon) ee Afargeeslaha meersan. 	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Sii Ardayda Laylisyo ku saabsan Afargeesleyaasha meersan iyo Fikraddaha la xidhiidhaba.

CUTUBKA 6^{ad} : BARASHADA ITIMAALKA (15 Xisadood)**Ujeeddooyinka Guud ee Cutubkan:**

Cutubkani marka uu dhammaado kadib, Ardaydu waxay Awood u yeelan doonaan (Awood u yeelan karaan)

- Fahamka Fikraddaha Maxsuullada dhabta ah, kuwa aan la xaqiijin Karin (la saadaalinkarin) iyo kuwa aan suurtaga lkaba ahayn.
- Qgaanshaha xaqiiqooyinka khaaska u ah waqdhacda, Tirada maxsuullada iyo Itimaalka waqdhacaha Fudud.

Ujeeddooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
<p>Ardaydu waa in ay Awood u yeelan kartaa:-</p> <ul style="list-style-type: none"> ▪ Kala soo cidda Maxsuulada (Natiijada) Dhabta ah (suurtagalka la) iyo kuwa aan suurtagalka ahayn. 	<p>6. BOARASHADA ITIMAALKA</p> <p>6.1. Fikradda Itimaal (5 Xiso)</p> <ul style="list-style-type: none"> ▪ Maxsuulka dhabta ah . 	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Ka caawi Ardayda in ay kala soocaan Maxsuulada dhabta ah (certain outcomes) iyo kuwa aan suurtagalka ahayn (Impossible out comes), Iyaga oo keenaya (ku siinaya) Tusaaleyaal Nololsha dhabta ah oo kala duwan sida kuwan soosocda:- <ul style="list-style-type: none"> → Isniinta maalinta ka dambaysa waa Talaado. → Laba xarriiqood oo isgoynaya waxay Iska gooyaan saddex Barood. →Marka Biyaha la karkar iyo waxay isu bedelaan caano. → Qorraxdu waxay ka soo baxdaa Bari. ▪ Ku hoggaami arday in ay maxsuulka dhabta u qaataan “1”, maxsuulka aan suurtagalka ahayna u qaataan “0”. 	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Weydii Ardayda in ay ku siiyaan ama keenaan Tusaaleyaal ka duwan oo ay maskaxdooda ka keeneen.
<ul style="list-style-type: none"> ▪ Soo soocidda Tijaabinta, waqdhacda iyo Tirada waqdhacda. ▪ Soo 	<p>6.2. Itimaalka waqdhacaha fudud (10 Xiso)</p>	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Ka Taageer Ardayda in ay si Fiican u Fahmaan Macnaha “Itimaalka” iyaga oo sharrax ka bixinaya waxyaabaha aan la xaqiijin kar in Maxusuulkooda. Adiga oo 	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Weydii Ardayda Su’aalo ku saabsan Maxsuulada aan la xaqiijin Karin ee Tijaabinta. ▪ Sii Ardayda

Ujeedooyi nka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
<p>saaridda Itmaalka waqdhacaha Fudud.</p> <ul style="list-style-type: none"> ▪ Tibaaxidda Itimaalka oo ay u Tibaaxayaan (u bedelayaan) Jajabyo, JajabTobanle iyo boqolley (Boqolkiiba) 		<p>ku bilaabaya Tusaaleyaal sida:-</p> <p>→ Haddii aan shilin kor u Tuurno wuxuu u dhicikaraa Madax ama xarash.</p> <p>→ Roob ayaa dilidoona Barrito</p> <p>→ Haddii aan kor u Tuurno Laf-Laadhuu waxay u dhici kartaa mid ka mid ah lixda weji (1 ilaa 6) ee lafaadhuuga.</p> <ul style="list-style-type: none"> ▪ Ka caawi Ardayda in ay xaqiiqsadaan in waxyaabaha aan la xaqiijin Karin Maxsuulkooda (waxa ay noqon doonaan) Tiro ahaan iyada oo la Adeegsanayo xisaabta Itmaalka. ▪ Fursad u sii Ardayda in ay Qeexaan Ereyada kala ah “Tijaabin”; waqdhac; Tirada Maxsuulka (Tirada waqdhacaha) kadibna ka caawi Ardayda in ay kala soocaan ereryadaas iyo macnahooda iyaga oo adeegsanaya Tusaaleyaal kala duwan Tusaale ahaan Haddii aan kor u Tuurno Hal Laf-laadhuu, lix maxsuul ayaa suurtagal ah, kuwaas oo kala ah 1,2,3, 4, 5, 6, waxaana la yiraahda Tirada Guud Maxsuulada, Tuuridda lafaadhuugana. Waxaa la yiraahdaa Tijaabin sidaas oo kale mid kasta oo ka mid ah Tirooyinkaas lixda ah waxaa la yiraahdaa waqdhac. 	<p>Laylisy ku saabsan Raadinta Itimaalka waqdhacaha Fudud.</p>

Ujeedooyinka gaarkah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Barisharashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
		<p>▪ Ku hoggaami Ardayda in ay soo dhiraandhiriyaan Qaacidada (Jidka lagu helo) waqdhacda Itimaalka, iyaga oo adeegsanay Tusaaleyaal kala duwan. Itimaalka waqdhacdu =</p> <p><u>Tiradalagadoorbida max suulka</u> <i>TiradaGuudeeMaxsuulada</i></p> <p>▪ Ka caawi Ardayda in ay soo saaraan Itimaalka waqdhacaha Fudud, isla markaana ay u Tibaaxaan (u Qoraan) Jajab-Tobanle iyo Boqolley (Boqolkiiba) Tusaale :- Kasoo qaad xarfaha uu ka kooban yahay Ereyga “FASAL” ayaa lagu Qoray kaadhah, kadibna lagu riday Baakad yar-Haddaba waa maxay Itimaalka aad Baakadda yar kaga soo saari karto xarfka “A”?</p> <p>→ Tirada xarfaha uu ka kooban yahay Ereyga “FASAL” waa Tirada Guudee maxsuulada waana 5 maxsuulka aad doorbidday waa xarfka “A” markaa Tirada Xarfaha aad doonayso waa 2 - Itimaalka aad ku soo saari karto xarfka A =</p> <p><u>Tiradalagadoorbida max suulka</u> <i>TiradaGuudeeMaxsuulada</i></p> <p>$= \frac{2}{5} = 0.4 = 40\%$</p>	

Ujeedooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyin ka Qiimeynta
		$\frac{AC}{AB} = \frac{AD}{AC} \Rightarrow \frac{b}{c} = \frac{b_1}{b}$ $\Rightarrow b^2 = b_1c$ <ul style="list-style-type: none"> ▪ Adiga oo Taas ka duulaya ayaa waxa aad Qeexi kartaa Aragtiinka yukliidh iyo waydaarkiisa. ▪ Ku dhiirigeli Ardayda in ay Kashaqeeyaan Laylisyo badan iyaga oo ku dabbakhaya Aragtiinka yukliidh iyo waydaarkiisa sida Tusaalahan soo socda. <p>Tusaale :$\triangle ABC$ waa saddexagal Qumman oo shakaalkiisu yahay \overline{AB}, Jooggiisuna yahay \overline{CD} oo ku Qotoma \overline{AB}. Haddii $AD = 4\text{sm}$, $DB = 5\text{sm}$, markaa Raadi dhererrada \overline{AC} iyo \overline{BC}</p> <ul style="list-style-type: none"> ▪ Sidaas oo kale waxa aad siin kartaa Tusaaleyaal si ay u muujiyaan waydaarka Aragtiinkaas yukliidh 	
<ul style="list-style-type: none"> ▪ Dabbakhaadda (Adeegsiga) Aragtiinka Baytogarasi iyo waydaarkiisa si ay 	<p>7.1.2. Aragtiinka Baytogarasi iyo waydaarkiisa.</p>	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Fursad u sii Ardayda in ay Naqtiin ku sameeyaan Aragtiinka yukliidh. ▪ Ka caawi Ardayda in 	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Weydii Ardayda su'aalo ku saabsan Dabbakhidda

Ujeeddooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyin ka Qiimeynta
<p>ugu Furfuraan Mas'alooyinka la xidhiidha.</p>		<p>ay xidhiidhka yukliidh u adeegsadaan soo dhiraandhirinta xidhiidhka Baytogaras, ka dibna ay Qeexaan Aragtiinka Baytogaras.</p> <ul style="list-style-type: none"> ▪ Ku dhiirigeli Ardayda in ay “Aragtiinka Baytogaras” ku dabbakhaan Furfurista (xallinta) Adduunka ee dhabta ah. ▪ Fursad u sii Ardayda in ay falanqeyaan Weydaarka Aragtiinka Baytogaras, kadibna ka caawi Ardayda in ay kaas ku dabbakhaan Furfurista weedh-xisaabeedyada Nolosha dhabta ah iyaga oo la siinayo dhawr tusaale iyo Laylisyo kala duwan. 	<p>Aragtiinka Baytogaras iyo weydaarkiisaba.</p>
<ul style="list-style-type: none"> ▪ Sharxidda saamiyada Tirignoomateriga ee kala ah Sayn (sine), koosayn (Cosine) iyo Taajanti (Tangent) iyaga oo adeegsanaya saddexagal Qumman. 	<p>7.2. Barashada Bilowga ah ee Tirignoomateriga (12 Xiso)</p> <p>7.2.1. Saamiyada Tirignoomateriga .</p>	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Fursad u sii Ardayda in ay Magacaabaan shakaalka, Horjeedaha iyo Deriska xagasha Fiiqan ee la siiyey ee saddexagal Qumman. ▪ Waxa aad Tusaale u qaadani kartaa Saddexagalkan Qumman ee ABC 	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Sii Ardayda Laylisyo ku saabsan Mas'alooyin la xidhiidha Faahfaahinta Saamiyada Tirignoomateriga (Saynka, koosaynka iyo Taanjentiga) ee xagalaha saddexagal

Ujeedooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
		<p>Magacow</p> <p>I. Shakaalka ΔABC</p> <p>II. Horjeeddaha ΔABC (Dhinaca ka soo horjeeda xagasha Fiiqan ee la suntay – B)</p> <p>III. Deriska ΔABC (Dhinaca la deriska ah xagasha Fiiqan ee la suntay).</p> <ul style="list-style-type: none"> ▪ Ku hoggaami Ardayda in ay Qeexaan ama sharrax ka bixiyaan saddex ka mid ah saamiyada Tirignooma teriga (Sine, Cosine iyo Tagent) iyaga oo adeegsanaya saddexagalka Qumman Sida ΔABC ee kor ka muuqda una muujinaya sedan soo socota:- <p>Sin</p> $\hat{B} = \frac{\text{DhererkaHo rjeeddaha}\hat{B}}{\text{DhererkaShakaalka}}$ <p>Cos</p> $\hat{B} = \frac{\text{DhererkaDeriska}\hat{B}}{\text{DhererkaShakaalka}}$ <p>Tan</p> $\hat{B} = \frac{\text{DhererkaHo rjeeddaha}\hat{B}}{\text{DhererkaDeriska}\hat{B}}$ <ul style="list-style-type: none"> ▪ Fursad u sii Ardayda in ay macno ahaan si Fiican u dhuuxaan mid kasta oo ka mid ah saamiyaddaas, 	<p>Qumman oo la siiyey dhererka dhinacyadiisa laba ama ka badan (uogolow in ay adeegsadaan aragtiinka baytogarasi ay u Raadiyaan dhererka dhinaca maqan).</p> <ul style="list-style-type: none"> ▪ Hubishaqad ooda

Ujeeddooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
		iyaga oo ka Ambaqaadaya Tusaaleyaal dhawir sida:- Tusaale : Soo saar saynka (sine), koosaynka, (cosine) iyo Taanjentiga (Tangent) xaglaha cabbirkood u yihiin x^0 iyo y^0 ee lagu siiyey.	
<ul style="list-style-type: none"> ▪ Soo saaridda Qiimaha saamiyada Tirignoomateriga ee xaglaha cabbirkoodu yihiin 30^0, 45^0 iyo 60^0. 	7.2.2. Qiimaha saynka, koosaynka iyo Taanjentiga ee Xaglaha Cabbirkoodu yahay 30^0 , 45^0 iyo 60^0 .	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Ka caawi Ardayda in ay soo saaraan Qiimaha $\sin 60^0$, $\cos 60^0$, $\tan 60^0$, $\sin 30^0$, $\cos 30^0$, iyo $\tan 30^0$ iyaga oo adeegsanaya saddexagal siman oo dhererka dhinacyadka caawinaya sedan soo socota:- $\triangle ABC$ waa saddexagal siman b) Sawir Qotomaha \overline{CD} oo ku Qotoma dhinaca \overline{AB}. t) Soo qaado $\triangle ACD$, kadibna Adeegso xidhiidhka Baytgoriyaan si aad u 	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Weydii Ardayda in ay Raadiyaan saamiyada Tirignoomateriga (Sine, Cosine iyo Tangent) ee xaglaha 30^0, 45^0 iyo 60^0 iyaga oo Adeegsanaya Dhawr saddexagal. ▪ Hubi shaqada Arday kasta.

Ujeedooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
		<p>raadiso dhererka \overline{CD} sida</p> $(AC)^2 = (AD)^2 + (CD)^2 \Rightarrow$ $(2)^2 = (1)^2 + (CD)^2$ $CD = \sqrt{3}$ <p>J) Adeegso Jidka lagu helo Qiimaha Saamiyada Tirignoomateriga (Sine, Cosine and Tagant) si aad u Raadiso Qiimaha ku began ee Xagalahaas. Tusaale ahaan</p> $\sin 30^\circ = \frac{\text{Dhererka Horjeeddaha}}{\text{Dhererka Shakaalka}}$ $\sin 30^\circ = \frac{AD}{AC} = \frac{1}{2}$ $\cos 30^\circ = \frac{\text{Dhererka Deriska}}{\text{Dhererka Shakaalka}}$ $\cos 30^\circ = \frac{CD}{AC}$	

Ujeeddooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
<ul style="list-style-type: none"> Dabbakhidda saamiyada Tirigoomateriga ee xaglaha 30° iyo 60° si ay u Furfuraan Mas'alooyinka la xidhiidha. 		$\cos 30^\circ = \frac{\sqrt{3}}{2}$ $\tan 30^\circ = \frac{1}{\sqrt{3}}$ $\tan 30^\circ = \frac{AD}{CD}$ $\tan 30^\circ = \frac{1}{\sqrt{3}}$ <ul style="list-style-type: none"> Sidaas oo kale soosaar Qiimaha sin 60°, Cos 60° iyo Tan 60°, Adiga oo adeegsanaya Habkaas kore. <p>Ka caawi ardayda in ay soosaaraan Qiimaha Sin 45°, Cos 45°, iyo Tan 45° iyaga oo adeegsanaya saddexagal Qumman oo labaale ah oo dhererka Addimadiisu (Horjeedaha iyo deriska) yihiin $\sqrt{2}$. Halbeeg (Xusuusin:- Dhererka Shakaalku waa .</p>	$\frac{\text{Dhererka Horjeedaha}}{\text{Dhererka Deriska}}$

Ujeedooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyin ka Qiimeynta
		<p>Habeeg. $\sin 45 = \frac{1}{\sqrt{2}}$</p> <ul style="list-style-type: none"> ▪ Hooseeyaha Ha ka dhigin Tiro Lakab leh). ▪ U horsed ardayda in ay ka shaqeeyaan Tusaaleyaal dhawr ah oo ku saabsan Furfurista Mas'alooyinka Adduunka ee dhabta ah, iyaga oo Dabbakhaya saamiyada Tirignoomateriga ee xaglaha cabbirkoodu yahay 30° iyo 60°. Sida Tusaalahan soo socda:- ▪ Sida ka muuqata Jaantuskan kore Barta "A" waxay u Jirtaa sagxadda Dhismaha Dugsiga Fogaan dhan 15m, Cabbirka xagasha 	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Sii Ardayda mas'alooyin ku saabsan Dabbakhaadda saamiyada Tirignooma teriga ee xagalaha 30°, 60° iyo 45° kuwaas oo ka Tarjumaya Nolosha dhabta ah.

Ujeedooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
		<p>ay sameeyaan Barta "A" iyo Fiiqa u korreeya Dhismaha Dugsiga (oo ah Barta C) waa 60°. Haddaba Raadi Joogga Dhismaha Dugsigaas.</p> <p>Furfuris:- U Fiiro $\triangle ABC$, waa saddexaga Qumman. Waxaynu Adeegsan karnaa saamiga Tirignoomateriga ee ah Tan 60°.</p> $\tan 60^\circ = \frac{BC}{AB}$ $\tan 60^\circ = \frac{b}{15}$ $b = 15 \times \tan 60^\circ$ $b = 15 \times \sqrt{3}$ $b = 15\sqrt{3} \text{ m}$ <p>\therefore Joogga Dhismaha Dugsigu waa $15\sqrt{3} \text{ m}$.</p> <p>▪</p>	
▪ Soo soocidda Qaybaha	7.3. Shaxannada Adkaha ah	▪ Ku xiisageli Ardayda in ay sheegaan	▪ Weyii Ardayda in ay

Ujeedooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
<p>Bayraamidhka</p> <ul style="list-style-type: none"> ▪ Soo soocidda moodheelada Bayraamidhka ▪ Magacaabista Noocyada kala duwan ee Bayraamidhyada iyada oo laga Furinayo Salalkooda. 	<p>(6 Xiso)</p> <p>7.3.1. Bayraamidh</p>	<p>walxaha kala duwan ee qaabkoodu yahay Bayraamidh iyaga oo muujinaya moodheellada Bayraamidhka.</p> <ul style="list-style-type: none"> ▪ Fursad u sii ardayda in ay soo soocaan Geeska, Cidhifka, salka iyo wejiyada Bay raamidhka, iyaga oo Adeegsanaya moodheel. ▪ Ku dhiirigeli Ardayda in ay Bayraamidka u Qeexaan sedan soo socota “Bayraamidhku waa shaxan Adke ah oo ka sameysan sal iyo Bar aan ku dul dhicin salka oo la yiraahdo Fiiq (Aex). Bayraamidhka waxaa lagu magaca salkiisa). Bayaraamidh 	<p>soo soocaan</p> <p>Qaybaha Bayraamidhka iyo toobin Goobeedka.</p>

Ujeeddooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
		<p>Labajibbaaran kani waa Bayraamidhka BCDE.</p> <ul style="list-style-type: none"> ▪ Ku hoggaami Ardayda in ay si Fiican u dhuuxaan Noocyada Bayraamidhyada sida Bayraamidh saddex-Geesle ah (saddexagal ah), Bayraamidh shan-Geesle ah. Isla markaana ay ku soo Gabagbeeyaan. <p>Marka salku yahay Goobo Bayraamidhku wuxuu noqonayaa Toobin.</p>	